# BEERTA XIKMADAHA

MURTIDA IYO XIKMADA ALLE AYAA BIXIYO CIDA

UU ALLE SIIYANA QEER BADAN AYUU UGU DEEQAY

QORAAGA BUUGA

CABDALE CALI CANSHUUR

(CANSHUUR XIKMAAWI)

# Sadqeyn

Xuquuqda buugaan waa free ama waa bilaash, oo waxa aan u sadaqeeye aabahey macan, iyo abtigey macan, iyo walaalkey macan, dhamaantood alle janada fardowse ha ka waraabiye, sido kale waxa aan alle ka balan qaaday in aan u sadqeyn doono buugeeya koowaad hadii aan helo wax aan ku taamaye maantane waan helay alxamdulilah.

Buugaan ma jirto cid xuquuqdiisa sheegan karto, oo waa free xuquuqdiisa.

# Mahad naq

Mahad dhamaanted waxa ey u sugnaatay alle, kaas oo ii suurta galiye in aan qoro buugaan aad maanta aqrisaneyso waliba mudo kooban oo 2 bil ah, waxaa kale oo aan u mahad celinayaa hooyadey macaan iyo aabahey macaan, oo u istaagay in ey iga soo saaran ninka aan maanta ahay, sido kale waxa aan u mahad celinayaa dhamaan cid walba oo garab igu siisay qorida buugaan, sida walaalahey, saaxiibadey oo ahaay kowo igu dhiiri galiya in aan dhameystiro buugaan.

# HORDHAC

Buugaan sababta aan u qoray waxa ey eheed in aan arkay buugaag badan oo laga qoray mowduuca ah xikmadaha balse waxa aan ka waaye buugaagtaan mid xikmada si wacan u faah faahinayo, markaas ayaan bilaabay in aan dib ugu laabto buugaagteyda aan xikmadaha ku qoran jiray, balse waxa aan helay in ey iigu qoran yihiin buugaagta ku dhawaad 500 oo xikmadood, markaas ayaan bilaabay in aan inta xulka ah soo qaato, oo aan waliba si xirfadeysan oo isku dhafanaan cilmiyadeesan ka muuqato u qoro, waana sida aan maanta u qoray, oo xikmad walbo aan soo qaato waxa aan ku dhisayay kitaabka quraanka iyo sunaha nabiga (scw) iyo qisooyin dhacay iyo tusaalooyin wax lagu fahmi karo.

“Gabadha sadex arin ayaa maamuus u yeela waana anshaxa aqoonta iyo aqlaaqda suuban„

Saaxiib gabdhuhu bulshada waxa ey ku leeyihiin saameen weyn, oo bulshada ey gabdhaheedu wanaagsanaadaan waa ey wanaagsanaan, hadii se bulshadaas gabdhaheedu xumaadaane waa ey xumaan, gabdhuhuna wax ey qeyb weyn ka qaataan tarbiyeenta bulshada nabiguna (scw) waa kii lahaay ubad walba oo la dhalayo waxaa lagu dhalaa fidrada islaamka balse labadiisa waalid ayaa kirishtan ka dhigayo ama yahuudi ka dhigayo.

Sidaas aa wadeed hadii ey gabadhu anshax aqoon iyo aqlaaq isku darsato waxa ey soo saartaa ubad anshax ahaan aqoon ahaan iyo aqlaaq ahaanba u dhisan ubadkuna waa bulsada.

“Quruxda hantiiluhu waa deeqsinimo quruxda saboolkuna waa qanaaco quruxda gabadhuna waa dhowrsanaan„

Saaxiib hadii uu alle hanti ku siiye, waa in aad barataa sharafta lacagta, waana in aad bixisaa goorta ey bixintu haboon tahay, aadna heysataa goorta ey dhaqaaleenteedu iyo heysashadeedu haboon yihiin.

Saaxiib saboolnimadu dhib maleh, oo saxaabaduba fuqaro wey lahaayeen hadane dhowrsanaan ayee ku sheeganaayeen, oo alle ayaa quraankiisa ku amaanay oo yiri:

**يحسبهم الجاهل أغنياء من التعف**

**(Waxa ey umaleenayaan wax magaratadu hodon inee yihiin dhowrsanaantooda aawgeed)**

Saaxiib hodontinimadu waa gudaha, oo waxa aad arkeysaa, hadii aad qisada saxaabada u daymo badiso, in ey xaabo soo guraan ka dibna ey gadaan, lacagta ey ka

soo helaan dadka in ey ku sii sadaqeysan jireen, ayaga oo aan waxba ka dooneen, waxa eyna dhihi jireen dadka ey wax siinayaan sida tan:

**إنما نطعمكم لوجه الله لا نريد منكم جزاءً ولا شكوراً**

**(waxa aan idiin quudin dar alle niikama dooneyno xagiina abaal mar iyo mahadnaq toona)**

Saaxiib Quruxda gabadhuna waa in ey is asturto, oo jirkeeda xariirta ah raga dugaaga ah ee waayaheenaan dhaqan ey ka xijaabato allane sidaa ayoo faray oo waxa yiri:

**يدنين عليهن من جلا بيبهن**

**(Haku dadaan dushooda jilbaabadooda (hugooda)**

Saaxiib gabadhu waa dheyman inta ey dharkeeda ku dhax jirto, hadiisa ey is qaawiso waa ey qiimo beeli.

“Qofka wax walba fahmaa wax walba wuu cafiyaa oo iska dhaafaa„

Saaxiib qofka marka uu indheer garad yahay, allane uu fiiro dheer siiye iyo maskax si wanaagsan u fikirta waxyaabo badan oo ey dadku badan koodu cafiyi Karin ayoo si fudud iskaga cafiyaa.

Tusaalane waxaa kuugu filan nabiga (scw) markii oo reer (daa, if) aaday marka ey soo dhagaxeeyeen waliba dhiiga madaxiisa ka soo daatay oo gaaray kobiiisa ayaa alle u soo diray malakul jibriin isaga oo la socdo Malaga buuraha

Waxa oo ku yiti maxamadow kani waa malaga buuraha waxa oo doonayaa inoo ku salaamo waa uu salaamay ka dib waxa uu kuyi muxamadow waxa uu kuu

yiri rabigaa hadii aad doono la badaan buurood ayaan ahlu maka oo dhan ku soo dumaa waxa oo yiri nabiga (scw) iskaba daayee waxa aan rajeynaa in uu alle ka soo saaro dhabaradooda ruux oranaya (لااله الاالله)

Mar kale waa Kan nabiga (scw) oo oranaya

(اللهم اهد قومي فانهم لايعلمون)

**(Ilahayow tolkeyga hanuunu oo wadada xaqa ku duw ayagu waba garan maayane)**

Goorta oo nabiga saan dhan ugu diir naxaye tolkiisa waa maalinta uu godka ku dhacay ee ey ilkihiisa lajabiyeen wajigiisa dhaawaceen.

Saaxiib nabi nuux (csw) si walba towlkii woo u waaniye weyna iska indha tireen oo dhagaha ayee ka fureesteen ilaa uu alle ku yiri:

لن يؤمن من قومك إلامن قدءَامن

(**Kuma rumeyn doonaan qoomkaada ilaa cida ku rumeysay mooyaaan**)

Saaxiib nabi ibraahin (csw) soo tolkiisa u waanaye inta ey waanada fahmi waayeen ayee dab weyn ku rideen marka oo alle ka soo saarayne woo iskaga tagay tolkii asiga oo aan alle weydiisan in oo uga cad gooyo.

**Saaxiib sidaa waxaa sameen karo uun indheer garadka iyo hal yeeyada.**

“Nolashu jaceyl la, aanta ayey ku sahlan tahay balse waa macne daro„

Saaxiib waa hubaal in ey nolashu fududahay oo iska sahlan tahay marka aad qoyskaada la nooshahay ama aadba kaligaa nooshahay ee eysan jirin cid biil ama lacag toona kaa rabtaa oo faraqa kugu dhagan, oo waxa aad heysataa xuriyad ah, in aad marka aad rabto asxaabtaada iyo dadka kugu faca ahi aad aroosyada ama aad salaxyada isku raacdaan amaba aad habeenki oo dhan aad ciyaaro ku dhafartaan adiga oo aaminsan in aan bari xafiis shaqo lagaa rabin, waa hubaal noloshaas waa nolol xuriyad iyo daganaashiyo leh balse aan macno buuran qof ahaantaada u sameyneyn.

Tusaale: subaxdii firaashkaada ayaad ka soo toostaa habeenkina waxa aad ku laabataa, adiga oo wax la sheego dunidan ka soo qabsan.

Bal iisheeg saaxiib: ma isku mid baa qof noloshaan aduun ka shaqeystay irsaaq xalaal ah, ee guursaday lamaane ama xaas xalaashiisa ah, allane oo ku irsaaqay ubad ama caruur yar yar oo galbtii marka oo shaqada ka soo caraabayo (tagayo) wadada ku sii sugayo oo marka ey isha ku dhuftaan ama arkaan u soo kala baratamaya (yaacaya) ayaga oo ku hadaaqaya aabe mcne, iyo mid ey noloshiisu tahay tan aan kor ku soo xusnay oo kale.

Jawaabtaada: waa may ayaan umaleenaa.

Saaxiib maxaa ka qurux badan marka aad heysato xaas laabta ku galiso goorta aad murugeysan tahay,

Maxaa ka qurux badan marka aad heysato ubad aad moodo xidigaha, adiguna aad u tahay sida dayaxa oo ey kugu hareeraysanyihiin, aadna uga sheekeyneyso, sheekooyinka maankooda korinaya, sida qisooyinka nabiyada iyo saxaabada iyo dadkii wanaagsanaay ee saxaabada ka danbeeye.

Saaxiib nolashu waxa ey ku qurux badan tahay, in aad lamaane yeelato, in aad lamaane yeelatane waxa ey u baahan tahay, in aad shaqeysato oo aad noqoto nin lamaanihiisa waxa ey u baahan tahay siin karo.

Saaxiib nolashu waa ey socon ee gaariga haka harin oo haka dhicin.

"Aqoonta bilaa diinta ahi waa jiis se diinta bilaa aqoonta ahine waa indhoole„

Saaxiib qofku mar hadii uu aqoon leeyahay balse aanu diin laheen waa sida qofka jiiska oo kale laga yaabaa in qofka jiiska ah ey lugtiisu ku taalo balse aanu sida ey tahay ugu soconeen.

Tusaale: ninkii nalka ama leerka sameeye dunidaan aad u jeedo ayuu habeenki ifiye balse waxa uu ifsan waaye qabrigiisa.

Sh.mustafane: waa kii laaay aqoontu waa ta naarta kaa bad baadisa uun.

Sido kale diinta bilaa aqoonta ahine waxaa tusaale kuugu filan in ey tahay indhoole nimo kuwa isku sheegaya aqoon yahano ama barafasooro iyo

siyaasiyiin hadane aad arkeyso in ey aqoon maadi uun lee yihiin.

Tusaale: mar ayaan arkay muuqaalo dhoor ah, oo laga soo kala qaatay dad siyaasiyiin iyo xilibaano isku sheegayo, oo leh: anagu ma qabno in wadanka lagu dhaqo diinta, sababtuna ey ku sii sheegayaan maraykanka oo naga caqli badan ayaa diinta ku dhaqmi lahaay, marka waa in eynu dimu quraadiyada oo mareykani wado dadkeena ku dhaqnaa.

**Saaxiib marka koowaad horta baro diintaada, ka dib baro aqoonta kale ee ku anfaceysa adiga iyo cida kugu xeeranba.**

“Marka uu qof ku qiyaamo waa sida in uu gacanta ku jaray oo kale, waad awoodaa in aad cafiso balse ma awoodid in aad laabta

galiso„

Saaxiib qiyaamooyinka iyo dagitaanadu waa ey kala xanuun badan yihiin marka uu saaxiib kuu dhawi ku qiyaamo, waa ey kaaga xanuun badan tahay qof kaa fog marka uu ku qiyaamo, sidaa oo kale gacan aad dhunkan jittay in ey ku disho, waa ey ka xanuun badan tahay gacan aad waligaa arag, ee noqo qof marka la qiyaamo aanan dadka markiisa dagin oo qiyaamin, taasine waa dar daaranka suubanaha (scw) oo waxa oo yiri

(ولاتخن من خانك)

**(Ha qiyaamin xataa cida sida bareerka ah kuu qiyaameysa).**

“Dadka wax tar dhibic biyoodne hala ekaato″e″„

Saaxiib waxaa jiro wanaagyo yar yar oo aynu uga joogsanay si ey dadku inoogu dhaleeceen oo noogu caayin, Tusaale:maalin aniga oo la socdo saaxiibadeey, ayaan wadad waxa aan ku soo marnay maamo miskiin ah oo wadada la fadhida cunug yar, anigane jeebkeyga waxaa ku jirtay lacag yar sadax kun ama laba kun ah, inaa siiyo ayaa damcay balse waxaan hoos iska dhahay:war ma adiga oo ninkaadaan weyn ah maad laba kun u taagaya maamadaan, war orodoo dadkaadan hore u raac wax labixiyo maahin laba kune, laga yaabaa xaalad nuucan oo kale in ey ku soo martay, balse waa hubaal

sadaqadu yaraan iyo weynaan ma leh saaxiib, ee u niyeeso ilahey dartii, wax kaste oo ilaahey dartii loo bixiyaane wey barakoobaan oo waaraane.

Nabigane (scw) waa kii lahaay: naarta iskaga ilaaliya timir jeexeedba ha ahaado˝e˝

Saxiib sadaqadu maahin kaliya lacag in labixiyo, hadalkaada wanaagsan ee aad qof murugeysan ku qalbi dajineyso waa sadaqo, agoonka aad madaxa u salaaxeyso waa sadaqo, hooyada aad gaarigaada hore ugu sii qaadeyso waa sadaqo, wadada aad qodaxda ka qaadeyso waa sadaqo, xataa ciyaalka aad laamiga gooysiineyso waa sadaqo,

Saaxiib sadaqadu waa wax kaste oo wanaag ah, oo aad ilaahey dartii u qabato marka waajibaadka laga yimaado.

**Saxiib faqrigu waxa uu ku jiraa wax bixin la, aanta ama sadaqa la, aanta.**

**Nabiga (scw) waxa oo inooga waramay in aanu jirin maalin ey adoomanku waabareystaan ilaa alle waxa oo soodiraa laba malak mid kood waxa oo leeyahay: ilaahayow sii mid wax bixiye badal, midka kalane waxa oo oranayaa: ilaahayow sii mid wax isku dhajiyane wax la, aan"**

Saaxiib sadaqadu maalka ayee badisaa mooye maalka ma yareyso waase hadii ey alle dartii kaa tahay sadaqadu.

“Jaceelka aadamuhu

naceeb woo isku badali

karaa balse jecelka alle

Isma bad badalo„

Saaxiib waa hubaal in jeceylka aadamaha oo is bad badalo waxaana tusaale: kuugu filan dhacdooyinka aad maalin kaste la kulanto adiga ama aad ka aragto baraha bulashada, waxa aad la kulantaa ama noloshaada ku soo biiro saaxiibo ama gabar lamaantaada ah, markaasaad aad iskugu dheeraataan oo waqti badan wadaqaadataan, dadkaas ey waayuhu idin kulansiiyeen markaas aad jeceel indha la, aan ah is jeclaataan, ilaa oo midkiin midka kale u maleeyo in uu ilaahey isagaba u abuuray, ka dib ayaa marar dhowr ah isku dhacdiin ilaa aad kala goosataan jeceelkiinaas, oo aad noqotaan labo lamaane oo midba midka

kale xagaas ka dhaho: doqonkaas indhaha xun ma u jeedaa, aduunka isaga ayaa ugu necbahay ama doqontaas ma u jeedaa balaayada indhaha xune, aduunka ayadaa ugu necbahay.

Saxiib ogoow: dadka saas is oranaya waa kuwa aduunka isku jeclaay.

Balse ilaahey mar hadii uu ku jeclaado inoo jeceylkiisa naceyb isku badalo waa ma dhacaan, oo ilaahey qofka oo jeclaado markiiba jibriil ayoo u yeeraa sida oo nabiga (scw) inoo sheegay ka dib ayoo ku yiraahdaa: anigu waxa aan jeclaaday hebel ee adine jecloow markaasow jibriil jeclaadaa, ka dib jibriil waxa oo u yeeraa ehelka samada ku

dhax sugan markaas ayoo ku yiraahdaa: alle waxa oo jeclaaday hebel ee idinkane jeclaada, markaasey ehelka samada jeclaadaan, ka dibne dhulka ayaa aqbalid ama jeceel loo dhigaa.

Saaxiib wadada iyo jeceylka ilaahey woo kuu furan yahay ee noqo, hebelkaas jibriil loo oranayo jeclow jibriilne oo malaa igta sii farayo in ey jeclaadaan hebelkaas, bal kawaran hadii aad adigu ahaan la heed hebelkaas, bal kawaran hadii kan dunidaan iska leh ku jeclaado, bal kawaran hadii kan janada iska leh ku jeclaado, bal kawaran hadii kan ubadka bixiyo ku jeclaado, bal kawaran hadii kan dadka hodanka ka dhigo ku jeclaado, waa kaas jeceelka aad raadin laheed saaxiib.

**Saaxiib Jeceyl is bad badalaayo haku doorsan jeceel aan sinaba isku dooreen.**

“Sidaa doonto u xumow

Balse

Ugu yaraan ha noqon

beenaale qiyaamoole ah„

Saaxiibow sida aa doonto u dhib badnow

Oo u bood bood iyo dhaadhac badnoow, dadku waa ey ku sii wadi karaan oo gacanta ayee ku qaban karaan balse maalinta aad beenlow noqoto, waa maalinta ey isku dhibidii iyo gacan qabshadii kaala laaban lahaayeen, sababtuna waa in aan beenaale leesku aamini karin, oo inta aad gacanta qabato ayoo ku dhihi karaa: gacan qabasho marabin ee paranki ayee iga eheed ee ma aanan qarqoomi rabin,

Saaxiib runta adiga ayee ku anfici ka hor inta ey dadka kugu xeeranba anfacin.

Allene asiga oo runta kuwa sheega ineenu ka mid noqono nagu boorinayo ayoo yiri:

يايهاالذين ءامنوا اتقوا الله وكونوا مع الصدقين

(**Kuwii iimaanka laga helayow illahey ka baqa oo ka mid noqda kuwa runta sheega**)

Saaxibow hadii aad qaayin nimada ku aragtid, ayada oo quraanka lagu amaanayo, qaayin iska noqo.

Waakan alle weyne oo oranaya:

ان الله لا يحب الخائنين

(**Alle ma jeclo kuwa qaayinada ah**)

“Xeerarka aqlaaqda ahi way inaga cad goostaan hadii aynu xurmadooda

Meel uga dhacno„

Saaxiib maanta weynu aragnaa xeerarka aqlaaqda sida eynu uga tilaabnay balse ka marka eynu ka tilaabnay maxaa dhacay hee, waa kuwaas markooda inaga aargoosanaya.

waxa ey aqlaaqda wanaagsan ina fartay,in ey inamadu ama gabdhuhu eysan raga codka ujilcin, oo si soo jiidasho leh ula hadlin raga, maadaama badiba raga qalbigooda xanuunka ama damaca ku badan yahay, balse maxaa dhacay marka ey gabdheheenii aqlaaqdaas ka soo tilaabeyn, waa taa eynu baraha bulshada eynu ka maqleeno gabar ayaa la soo qarxiye.

Aqlaaqda wanaagsan waxa ey ina fareysa, in eynu qamaarka ka tagno maadaama ey manfacadiisa ka badan tahay dhibtiisa balse marka eynu dhagaha ka furaysaney wanaagaas waa kaas eynu aragno rag badan oo u waashay lacag badan oo ey dhigteen qamaar oo laga cunay.

Aqlaaqda wanaagsan waxa ey ina fareysaa in eynu dhaxdeena salaanta ku faafino si eynu isku jeclaano balse marka eynu jir diidnay maxaa dhacay, waa kaas eynu inaga dhaxdeena kala carareynu oo kala cabsaneyno.

**Saaxiib wax kaste oo alle ina faray wanaag ayaa noogu jiro xataa qisaasta.**

“Hal ubax ayaa iila dhigmi kara beer dhan, hal saaxiibne waxa oo iila dhigmi karaa caalamka oo dhan„

saaxiib waa sax hadalka kor ku qoran oo hal ubax oo qof ku jecel si dabacsan oo kal gacal leh kuu siiye ayaa kaaga qiimo iyo farxad badan beer dhan oo ubaxyo ah.

Hal saaxiine caalamkaan ayoo kuugu dhigmi karaa, bal u fiirso abuu bakar iyo nabiga (scw) saaxiibtinimada ka dhaxeysay maalin ayaa nabiga oo qureysh ku gooban rabto arkay abuu bakar(alle haka raali noqdee) markaasoo isu taagay seysan waxba ugu geysan, markaasey asiga dhankiisa u soo jeesteen oo sida ey u dilaayeen ayee wajigiisii sharfanaay la garan waaye, mar kale waa kan nabiga (scw) oo markiisa

saaxiibkii qalbiga u dajaayo goortii ey mako ka soo hijroodeen, alle oo qalbi dajintaas inooga waramaya ayaa yiri:

**اذيقول لصحبه لاتحزن ان الله معنا**

**(Goor oo saaxiibkii u oranye, saaxiib ha murugoon alle ayaa nala jira ee)**

Saaxiib ogoow saaxiibka wanaagsan marka aad ooyeyso, waxa oo ku dhihi, ilintaan waa maanta ee bari janada kuma dhax ooyi doontid, saaxiibka wanaagsan waa kan marka aad xumaan ku dhacdo ku dhaho, hal mar ayaad ku dhacday ee waligaa ma aadan eheen mid danbiile eh, ee saaxiib waaya arag nimo ha kuu noqoto gaf kaan.

“Badso samaanta horaanteedu qaraar tahay lkn cirib danbeedkedu macaan tahay, oo ka tag xumaanta horaantedu macaan tahay balse cirib danbeedkeedu qaraar tahay„

Saxiib waa hubaal in wanaagu qaraar badan yahay (ka dhib badan yahay) xumaanta, oo xumaantu waa sahalo oo nafta ayaaba rabta in ey ku raaxeysato, oo dhadhankeedaas iska macaan saneyso balse xumaanta si walbo oo ey macaan u leedahay ugu danbeyn qaraar ayee ku soo idlaataa, tusaale: dadka qamriga iyo sigaarka caba intaas ey ku dhax jiraan cabidooda waxa ey ka helaan dareen yar oo raaxo iyo jawi qiyaali u sawiraya, balse marka ey daroogadaas ka baxdo waxa ey kawada siman yihiin dareenka ah ka shaleynta.

Wanaaga qabashadiisane qaraar iyo dhib aan dhayal eheen ayaa laga maraa, hadii

aan kuu tusaaleeyane: waa sida qof shaqo ku soo daalay oo rabo inoo sariirta isku tuuro balse ogaaday in salaadii subax la adimayo oo ey tahay in oo marka hore soo tukado, ka dibne iska seexdo balse nafta diidmo aan dhayal eheen ayee ula imaane balse marka uu kaco ee uu soo tukado, ka dib waxa uu dareemi xasilooni iyo dareen qalbi dhisasho oo ah (ilaahey woo u jeedaa  in aad dartii hurdadaadii uga toostay, ee aad biyaha qabow ku weesa qaadatay, ilaaheyne madayaco qalbiyada wanaagsan)

Saaxiib wax walba oo ilahey dartii loo sameeyo alle madayaco, ee wanaagyo badan dhigaasho.

“Si aad u noqoto ruux muhiim ah oo mudnaan leh waa in marka hore lagu qalad fahmaa„

Saxiib qalad fahanka aan kuu sheegayo si aad muhiim u noqoto, maahin in aad xumaan inta la imaado ey dadku ku ceyriyaan, ee waa inaa ula timaadaa, aqoon ugub oo dadka aduunkooda iyo aaqiradoodaba anfaceyso, haba ugu horeyso ee aqoonta diinta la xariirto, oo waxaa laga yaabaa in aad aragto dad wali ku dhagan aaminaado ama caqiido qalad, ama aadba aragto oday 60 sano ku sii dhaw dhaw oo salaada ka yara qaldan tahay, marka aad aqoontaas diinta ku saabsan ula timaado, oo lagugu colaadiyo ogoow in nabiyadaba sida tan loo galay.

Waa kan nabi (nuux) oo inta qoomskiisa waaniye ey ayagane ugu war celiyeen sida tan:

إنـالنريـك في ضلل مبين

(**Waxaan kuu aragnaa inaa baadi cad ku dhax sugan tahay**)

Mar kale waa kan nabi (huud) oo qoomkiisa inta waaniye ey ugu wac celiyeen sida tan:

إنالنريك في سفاهة وإنالنظنك من الكذبيين

(**Waxaan kuu aragnaa inaa doqon nimo ku dhax sugan tahay waxaana kuu maleyneynaa beenlow yaasha inaa ka mid tahay**)

Waa kan mar kale nabi (saalix) oo inta oo qoomkiisa waaniye ay ugu war celiyeen sida tan:

**ياصلح ائتنابماتعدنآ ان كنت من المرسليين**

(**Saalaxow noola imaaw waxaa noogu goodineyso_oo cadaab eh_hadii aad ka mid tahay kuwa la soo diray**)

Waa kan nabi (luud) oo loogu war celiye:

**أخرجوهم من قريتكم إنـهم أنـاس يتطهرون**

(**Ka saara tuuladiina ayaggu_nabi nuux iyo xertiisa_ waa dad is dahira ee**)

Waa kan nabi shuceyb markiisa ayada oo Oo laagu war celinayo:

**لـن تبعتم شغيبا إنكم إذا لخسرون**

**(Hadii aad shuceyb raacdiin kuwo hoogay ayaad tiiin)**

Ugu danbeyntiina waa kan nabi (muxamad_scw_) oo loogu war celiye sida tan:

**إن تتبعون إلارجلا مسحور**

**(Raaci meysaan ilaa nin sixroole ah mooyaan)**

Saaxiib mowduucaan waan kugu dheereeye ee iga raali noqo.

**Saaxiib qalad fahanka dhabaha saxan haya waa kaa ee dhibta kaa soo gaarto u sabar.**

“Hadii ey xaqiiqadu ahaan laheed gabadh dadka oo dhan ayaa jeclaan lahaay„

Saaxiib oraahdaan waxa ey u egtahay mid kaftan ama majaajilo leh balse marka aad u fiirsato waxa aad ogaaneysa in ey wax jiro ka hadleyso, oo dhamaanteen ma jeclin xaqiiqada waxa ey tahay balse xaqiiqada anaga oo ka fir dhaneyno ayaa wax yaabo qaar ku dhacnaa tusaale: waxa ey badiba dadka sigaarka cabo marka looga waramo dhibtiisa ku hadaaqaan oo hadii oo dhibtaas oo dhan leeyahay maxey dhaqaatiirtu u cabaan, hadalkoodaan waxa ey ugaga fir dhanayaan xaqiiqada ah in uu sigaarku dilaay yahay.

Tusaale: waxaas oo dhan ka sii dhawne waxaa kuugu filan sida eynu uga cararno oo isku diidsiino xaqiiqada ah (geerida)

Saaxiib geerida hadii ey wax qurux badan tahay dadka oo saas dhan uga fir dhanayo ma adaan aragteen.

Saaxiib xaqiiqada si walba oo ey u qaraar tahay qaado, xataa jeceylkaada oo kaa tagayo ha ahaado amaba saaxiibkaa oo dhabarka kaa toogtay xata ha ahaado ee waligaa xaqiiqada ha is diidsiin.

**Saaxiib**

**Xaqiiqadu waligeed xaqiiqo ayee ahaan mala awaalkane mala awaal uun.**

“Caagada marani way
ka sawaxan badan tahay
caagada buuxda,
garadada dadkuna waa
sidaas uun„

Saxiib waxaa labadeenaba si wacan u garaneynaa in marka caaga marani_faaruqa ah_oo meel sare ka soo dhaco ama dhulka lagu tuuro oo cod ama sawaxan dheer sameynayo, sidaa oo kale waxaa eh garaadka dadka, oo qofka aan aqoonta laheen marka ey arin la soo gudboonaato ama fikir lidi ku ahi marka uu arko waa uu qeyli iyo muran badan yahay, halka qofta aqoonta lahina oo si dagan u waajaho arimahaas oo dhimi, oo waa sida caaga buuxa oo aqoon iyo waayo aragnimo ayaa ka buuxda.

**Saaxiib garaadkaada buuxi si aadan sawaxan badane u noqon.**

“Hadii aad wanaag ku daasho daalku wuu tagayaa ajirkuna wuu kuu harayaa balse hadii aad danbi ku raaxeysato oo macaansato, macaansigu wuu tagayaa danbiguna wuu kugu harayaa„

Saxiib bal u fiirso wax yaabaha eynu ku raaxeysano badigood danbi ayee u badan yihiin, haba ugu horeyso in eynu mar walba dhageysano heesaha, bal u fiirso marka eynu hablaha ajinabiga inaga ah huteelada jirkooda iskaga dhag dhageeno, raaxo iyo macaansi yar ayeynu ka helnaa balse danbigeeda iyo ciqaabteeda ayaa kun mar ka xanuun badan raaxeysigaas.

Saaxiib u fiirso wax walba oo ajir iyo raaxeysi inoo haraya eynu ku heleyno waa eynu ku daalnaa, oo tacab aan caadi eheen ayeenu kala kulanaa haba ugu horeeyaan: salaadaha shanta ah, iyo aqrinta quraanka, iyo sunooyinka

salaadaha ka danbeeya balse ajirkooda hadii lala bar bar dhigo daalka lagala kulmayo salaadaha kaaf iyo kala dheeri waaye.

Saxiib bal u fiirso nabiga (scw) habeenki dhan salaad ayoo tukan jiray ilaa ey cagihiisa dil dilaacaan.

Saaxiib bal u fiirso saxaabada (rcw) dagaalada ey gaalada la galeen waxaa ka mid ahaay dagaal meel dheer u aadayeen oo magaciisu ahaay (daatu riqaac) sawabta loogu bixiye waa in ey saxaabadu kulka jiray aawgeed cagaha maro ku xir xirteen si ey gaalada ula soo galaan oo ilahey kamadiisa ey u sareyso.

**(Wanaag samee hakuu haree saaxiib)**

“Qalbigaagu waa waxa ugu qaalisan aad heesato ee si wanaagsan u daryeel„

Saaxiib alle waxa oo yiri:

**ماجعل الله لرجل من قلبين في جوفه**

**(Alle uma yeelin nin laba qalbi gudihiisa)**

Saaxiib qalbigaada wanaagsan sii cida u qalanta, xataa hadii ey dhacdo in aad siiso cid aanan u qalmin wanaagaadaas, haka qoomameen ee ku faan qalbi wanaagsanaantaada, oo waxaa jiri kara qof inta aad qalbigaada quruxda badan siiso kuugu abaal gudi karo, in uu dhiiqada uga dhax tago.

Saaxiib jecelkaada sii cida ku wax taransaneysa,
waqtigaada sii cida ka faa, iideysaneysa,
raali galintaada sii cida kaa aqbaleysa.

Saaxiib wax kaste qiimo ayee lee yihiin, waase hadii boos kooda la dhigo.

Gabadhu qiimo ayee leedahay inta ey asturan tahay.

Dheymanku qiimo ayuu leeyahay inta uu bangiga yaal.

Lacagtuna qiimo ayee leedahay inta ey xalaal tahay.

Aadmiguna qiimo ayuu leeyahay inta uu alle ka baqayo.

**Saaxiib**

**Hadii aadan qalbiigaada qiimahiisa siin doqmo ayaa qiimo ka hooseeyo kaaga iibsanaya.**

“Dadka qaar indhahooda kuguma arkayaan ee waxa ey kugu arkayaan indha qof kale oo kaaga

soo sheekeeye„

Saxiib hadii aad aragto dad badan oo ku neceb hala yaabin, laga yaabaa in ey kagu arkayaan caqliga iyo ka waranka qof kale oo kaaga soo sheekeeye.

Saaxiib waa kan (abii lahab) oo daba cararaya nabiga (scw) waliba asiga oo ugaas eh, sababta oo udaba cararaye maahin in uu deen ku leeyahay, ee waxa ey eheed in eysan dadku rumeysan ama ey ku arkaan indhihiisa oo kale, maadaama oo isagu aragti xun ka qabay, aragtidaas oo eheed in uu nabigu (csw) waalan yahay oona sixroole yahay.

**Saaxiib dadka ku xakun waxa ey kuu soo muujistaan qalbiga se alle u daay.**

“Dadka qaar gefka ayaa koreysiiyo dadka qaarne samaha ayaa

dhaadhiciyo„

Saaxiib dawladaha aduunka maanta ka arimiyo ama ka maamuusan, badiba waxa ey halkan ku soo gaareen danbiyo ey galeen aawgeed, tusaale: mareykan oo quwada aduunka ugu ween lagu sheego, awoodaas oo maanta dunida ugu faanayo iyo maamuus kaas, waxa uu helay ka dib markii uu laba bam oo (nuclear) ah ku kala dhuftay labada magaalo ee shiinaha ka tirsan. (hiroshima_nagasaki) sido kale (ingiriis) waxa oo africa ka dhigay waad garaneysaan, france haka reebin iyo inta kale ee sooraacda.

Tusaale kale: hadii aan ku siiyo saaxib bal u fiirso nabi (yuusuf) qisadiisa asiga oo

wanaag sameenaya, ayaa xabsi la dhigay oo wanaagiisa ayaa xabsi u dhaadhiciye, mana ahan inaa ku dhahooyo wanaag ha sameen balse waxaan kuugu soo qaatay qisadan, sida dadka qaar wanaagooda u dhaadhiciyo danbiila yaashane u sharfo oo u sareysiiyo.

## Saaxiib

Marka aduunka la joogo danbiile shariif wuu noqon karaa, qof wanaagsane danbiile woo u muuqan karaa ee adiga mar walbe wanaaga la jir, waayo nabi (yuusuf) wanaagiisa ayoo sii haye ka dib waqtiga ayaa socday waa kaas boqorka noqday.

Saaxiib Waligaa wanaagsanaaw uun

Oo wanaagaada ayaa wanaag kuu dhalaya, dhowrsanaantaadane sharaf ayee kuu dhaleysaa, sido kale xumaantaadane xumaan ayee kuu dhali, caasi nimadaadane caasinimo ayee kuu dhali, alle asaga oo inooga warmayo ayoo yiri:

**هل جزآء الإحسان إلا إحسان**

**(Wanaag abaal marintiisu maahin ilaa wanaag mooye)**

Sido kale alle waxa oo yiri:

**وجزآء سيئة سيئة مثلها**

**(Xumaanta abaal marinteedu waa xumaan uun)**

“Dad badan dhageyso dad koobane la sheekeyso„

Saaxiib inaa wax badan dhageysato waxa ey kaa caawineysaa in aad xog ogaal u noqoto meelo dhowr ah, sidaas aawadeed dhageysiga doodaha iyo xogaha cilmiga ku dhisani aad iyo aad ayee kuu anfacayaaan, oo hadii aad aqriska ka caagan tahay oo ka qadsan tahay, ugu yaraan dhageysiga cilmiyada kala duwan haka caaganaan.

Oo ka mid noqo kuwa uu alle ka yiri:

الذين يستمعون القول فيتبعون أحسنه

(**Kuwa dhageysta hadalka ka dibna raaca_oo qaata_kiisa wanaagsan**)

Saaxiib dhageyso xogaha cilmiga ku dhisan oo ka tag maalaa yacniga waayahan.

“Ilaahey waxa oo inoo sameeye laba dhagood iyo hal carab si eynu u dhageysano in ka badan

inta eynu hadleyno„

Saxiib hadii aad u fiirsato maanta inta eynu wax dhageysaneyno ha ahaadan wacdi iyo barnaamish wax tar inoo leh ama kutub masaajid ka baxayo, waxaa aad uga badan inta eynu meelaha fadhi kudirirka iyo qabiil caayowga ku hayno.

Nabigane (scw) waa kii lahaay:

من كان يؤمن بالله واليوم الآخر فليقل خيرا أو ليصمت

**(qofkii alle iyo maalinta danbe rumeeye haku hadlo qeer ama ha iska aamuso)**

**Saaxiib wanaag ku hadal ama iska aamus oo shar iyo xumaan ama qabiil caayow haku hadlin oo (AF daboolan waa dahab).**

“Waxa ugu badan ee qofka dhibaa waa in uu ku dhinto gacanta kuwii uu dantooda ka talinayay„

Saaxiib bal ufiirso nabiya sida ee qoomam kooda ugu diir naxayeen iyo sida ee ugu war celinayeen, xataa qoomamka qaar hamigooda waxa oo gaaray in eyba dilaan nabiga uu alle u soo diray.

Alle (swc) waxa oo yiri:

وقتلهم الأنبيآء بغيرحق

(**Iyo dilkii ey dileen nabiyada_waliba_si xaq dara eh**)

Saaxiib wali ma dhageysatay ama ma aqriday qisada nabi yaxye iyo aabihii zakariye (csw) sida ey u xanuun badneed dilkii ey kala kumeen qoomkoodii ey la jeclaayeen maalin uun in ey wadadooda

soo qaadaan, oo ey ka mid noqdaan kuwa la jirkooda janada galaya, maalinta aanu saaxiibku saaxiibkii eegeyn hooyaduna curuurteedu eegeyn labadii aduunka isku jecleedna aaney is xasuusaneyn, oo qof walbe oranayo (nafteyda nafteyda) oo macnaheedu tahay nafteyda ayaanba wax u tari karin.

Saaxiib dilku wuu kala xanuun badan yahay, bal u fiirso hadalka uu ku dhaho saaxiibkaa ee dhaleecada ah, woo ka xanuun badan yahay hadalka ey dadka kunka ku dhaw dhaw ey ku dhahaan, sababtu waa in uu ka soo yeeray qof kugu qaali ah, dilkuna waa sidaa uun.

**Saxiib xanuunkaas oo dhan kama imaanayo madida lagugu gowracayo ama xabada lagugu tooganayo, ee xanuunku waxa uu ka imaanayaa qofka ku gowracayo ama meeshaan ku soo dhigay ee dilkaadaan ka danbeeye.**

Saaxiib bal suureyso adiga oo dalkaada iyo dadkaada cadaw ka difaacaya, hadii nin kugu dal ah, kugu dad ah, kugu luqad ah, cadaawaha kuu gacangaliyo, oo walibi maalin farxadeed ey dadkaada daawadaan adiga oo lagu dal dalayo, alla xanuunka uu dilkaas lahaay yaa weydiiyo cida ey saasi qabsatay.

**Saaxiib dilka cadaawahu xanuun maleh balse xanuunku waa gacanta ku dhiibtay cadaawaha.**

“Dhicitaan kastaaba maahan gaba gabadii, oo roobkaba soo dhicitaan kiisu waa bilaaw qurux badan„

Saxiib hadii aad umaleyso in ey noloshaada oo dhami ey gaba gabo mareyso ama xaaladii ugu adkeyd, xasuusnow in ilahey gacantiisa ku jirto noloshaada dhami, oo marnaba ha isku dayin in aad quusato.

Allane waxa oo yiri:

**لاتقنطوا من رحمة الله**

(**Raxmada alle haka quusanina**)

Saaxiib miyaadan u fiirsan roobka marka uu soo da,I rabo waxaa ka horeeyo cirka oo mugdiyoobo gugac cabsi leh, oo aad umaleyneyso marar qaar in umadiinaba lagu haligi rabo, balse cabsidaas oo dhami waxa ey tageysaa marka uu cirku

soo deeyo dhibcaha roobka ee udgoonka badan.

Saaxiib Hadii aan tusaale kale ku siiyo, bal u fiirso qisada nabi ayuub (csw) waxa uu xanuun sanaay (18) sano maalina kuma soo dhicin in uu alle ka quusto, taas lidigeeda waa uu usabray xanuunkaas oo alle ayaa ku amaanay sabarkiisa, oo alle weyne waxa uu ka yiri:

**إناوجدنه صابراً نعم العبدإنه أوّاب**

**(Waxa eynu helnay_ayuub_inoo yahay mid sabar badan oo_ alle_ u soo laabasho badan)**

Saxiib miyaadan u fiirsan qisada nabi yuusuf (csw) markii ceelka lagu riday ma aanu u arag gaba gabadii noloshiisa, oo

waa kan hadane laga been abuuranayo ee xabsiga loo taxaabayo, intaa oo dhan ma aanu quusan ee woo u sabrayay, ka dibne waa kaas boqor masar ka noqday.

Saxiib hadii aan kuu sheego sir yar oo qurux badan, u fiirso dadka dunida baal qurux badan ka galay, kuma eysan galin baashaal iyo iska raaxeysi, ee waxa ey ku gaareen marka laga soo tago ilahey doonistiisa (sabarka) ayee ku gaareen oo waxa ey ogaadeen culees kaste in uu ka danbeeyo fudeed sida oo alle yiri:

فإن مع العسر يسراً

(**Culees walba_oo nolosha ahi_ la jirkiisa waxaa ahaaday fudeed**)

Saaxiib aan kuu soo gaba gabeeye ma aadan maqlin miyaa qisada saxaabada markii uu dagaalka ku adkaaday in ey alle gargaarkiisa tabeen oo dhaheen:

متى نصرالله ألآ إن نصرالله قريب

(**Waa goorma ilaahey gar gaarkiisa_ka dib oo nabiga ku yiri_ilahey gar gaarkiisu wuu dhaw yahay**)

Saaxiib majaal kaste oo nolosha ka mid ah, waxa uu u baahan yahay sabar iyo adkeysi.

Cibaadadu sabar ayee u bahaan tahay,

Ganacsiga sabar ayoo u baahan yahay,

Inta kale noloshaada uga tusaale qaado.

Saxiib marka koowaad alle tala saaro ka dib noloshaan aduun adkeysi u yeelo.

“Awoodu ma han xaq

Ee

Xaqa ayaa awooda ah„

Saaxiib si walba oo aad u awood badan tahay maalin uun waad arki qof kaa awood badan, si walba oo aad xaqa uga hor imaadane xaqa ma qarin kartid oo maalin uun waad la kumi xaqi aad is la heed qari oo dabar gooy, asiga oo dunida oo idil ku faafay, oo tusaale waxaa kuugu filan (qureysh) sida ey u rabeen in ey xaqa dunida iyo dadkaba uga qariyaan iyo maanta sida oo xaqa dunida ugu baahay.

Saxiib hadii ey awoodu xaqa ka weyn tahay oo ka adag tahay (fircoon) maxoo nabi (muuse) iyo intii yareed ee la socotay uga guuleysan waaye.

Saaxiib mar kaste midka guuleysaayo waa xaqa iyo cida raacday, oo alle ayaa inooga waramay:

**قل جآء الحق وزهق البطل إن البطل كان زهوقا**

**(Dheh waxaa yimi xaqii oo baadilkii ayaa tirtirmay baadilkuna waxa oo ahaaday mid tirtirma)**

Saaxiib xaqa la jir xataa hadii ey bataan tirada baadilka qaadaneysa, oo quraanka hadii aad u yara fiirsato waxaa aad ku arkeysaa aayada badan oo lagu dhaleeceynayo tirada badan.

**Saaxiib**

# Xaqa ayaa raga ka awood badan.

“Inaad lahaato qalbi dabacsan xali aduunku wada adkaaday ma ahan taag daro ee waa geesinimo„

Saaxiib in aad u naxariisato masaakiinta iyo agoonta, xiligaan ey dunidu sicir bararka iyo ribada cirka isku shareereen ee aanu maskiinku waxba gadan karin, agoonkuna gurigiisa uu ku dhax baahan yahay, waxa ey ka dhigan tahay inaa heydo wadadii (nabi_yuusuf) oo kale, saaxiib waxa aan saas kuu leeyah, waa in aad dad noloshooda ka fakareyso si ey u baahan nabi (yuusufne) waxa oo rabay in eysan dadka baahan inta lagu guda jiro 7 sano ee abaarta ah.

Nabigane (scw) waxa oo yiri:

**إرحموامن في الأرض يرحمكم من في السمآء**

**(Cida dhulka ku dhaqan u naxariista adinkana waxaa nii naxariisan cida samada ku sugan).**

“Iska jir inaa dadka niyada ka disho ma ahan lafo kabmayo ee waa ruux la maquuniyee„

Saaxiib waligaa iska jir inaa qof qalbigiisa dhayalsato oo ku ciyaarto, waayo waxaa laga yaabaa inoo qofkaas qalbigiisa si Hagar la, aan ah kuu siiye.

Saaxiib alle waxa oo yiri:

**وجزآؤُاْ سيئة سيئة مثلها**

(**Xumaan abaal markeedu waa xumaan ayada oo kale**)

Saaxiib hadii aad dadka qalbiyadooda ku ciyaarto adigane markaada wey ku soo aadan tahay.

Alle sido kale waxa oo yiri:

**هل جزآء الإحسن إلّا الإحسن**

(**Wanaaga abaal markiisu maahin ilaa wanaag mooye**)

Saaxiib hadii aad qofka qalbiga jabsan aad madaxa inta u saalaxdo ku tiraahdo maxaad u murugoon ayada oo janadu tahay mid aan oolin murugo, iyo erayada qofka qalbiga u dhisaayo, waxa ey kuu tahay niyad dhiskaas sadaqo sida oo nabigu (csw) inoo sheegay:

**و الكلمة الطيبة صدقة**

(**Ereyga wanaagsan waa sadaqo**)

Saaxiib marka aad qof qalbi jabsan qalbiga u dhiseyso ogsoonow, alle inoo kaada wax dhibo kaaga ilaalin doono, marka aad qof murugeysan ka farxidane

Alle hadii aanu dunida kaaga farxin aaqiro ayoo kaaga farxin rabaa ee sugo.

Saaxiib qofka in aad caadi u disho ayaa u dhaanta in aad ruux ahaan u muquuniso oo u gumeysato

Soomaaline waxa ey ku maah maahday in kaste oo ey maah maahdaan qaldan tahay:

**(Rag ciil cadaab ka dooray)**

**Macnaheeduna yahay inta ey ragi ciilanaan lahaayeen is dil ayee ka doorteen ama in la dilo.**

"Iska cafi maan gaabka caadooyinka qabiilkiisa waxa uu u yaqanaa xeerar dabiici ah oo waajib ah„

Saaxiib waad ku qasban tahay inaa barato sida dadka loola dhaqmo, oo dadka waxa aad ka heleysaa mid iska kaa maagayo iyo mid ku soo dhaweysanayo iyo mid aanba wax kugu darsaneen oo gooni u socod ah, marka waa in aad yeelataa dhaqamo wanaagsan oo aad intaba kula dhaqanto.

Hada ka hor baa waxaa dhacday wiil in uu adeerkii ku yiri: wiilkeeyiyow amiirul mu, miniin ii geey, maadaama oo wiilku ka mid ahaay cumar binu khadaab waziiradiisa, odayguna waxa uu ahaay nin reer mii ah oo aan aqoon sida dadka madaxda ah loola hadlo, markaasuu wiilkii odaygii adeerkii ahaay cumar (rc)

u geeye, odaygii baa cumar hadal kulul oo qalafsan kula hadlay (cumar_rc) markiiba hadalka odayga ayaa ka careysiiye, ka dib wiilkii ayaa aqriye aayadan:

**خذ العفو وأمر بالعرف وأعرض عن الجـهلين**

(**Cafiska qaado wanaagana far kana jeeso kuwa jaahiliinta ah**)

Cumar (rc) markii uu maqlay aayadaan wuu qaboobay oo ninkii wuu iska cafiye,

Cumarne (rc) waxa uu ahaay mid marka aayad loo sheego isu taaga.

Saaxiib alle adoomankiisa uu tilmaamay maka mid tahay oo ka yiri sida tani:

**وإذا خا طبهم الحهلون قالواْ سلما**

**(Hadii ey la hadlaan_oo af xumeeyaan_kuwa jaahiliinta ah yiraahda nabad galyo)**

Saaxiib inaa cafis badnaato, waxa ey qeyb weyn ka tahay, wax yaabaha eynu uga dayaneyno nabigeena muxmad (scw) oo markii ey qureysh dhibeen oo maka ka soo sareen, waxa durbaba timi maalinkii uu furanaye magaalada (maka) markii oo furtayne qureysh oo ahaay dadkii maka ka saaray, saaxiibadiina cadibay oo dhibay ma aanu dilin oo ka aargoosan ee waxa uu ku yiri:

**إذهبواْ فأنتم الطللقاء**

**(Baxa adinku kuwa la daaye ayaa tiniine)**

"Caanimadeydu mar kaste oo aan fashilmo way sii koradhaa„

Saaxiib waa hubaal ah in eynu maanta ku aragno bogaga taariiqda, dad badan oo u bareeray fashil kiisa ugu xun balse gaaray guul aad u weyn.

Tusaale dhow hadii aan ku siiyo waxaa la sheegaa ninka sameeye (nalka) in uu ku fashilmay sameenta nalka, tiro gaareysa (999) mar balse waxaa u xigay fashilkaas aadka u tirada badnaay caanimo iyo maamuus aduun.

Saaxiib hadii eynu dadkeena soomaalida u nimaano waxaa arkeysa inee xikmadan si qaldan u adeegsanayaan, oo waxaa hubaal ah in aad maalin uun baraha bulshada kula kulantay ayada oo la leeyahay qof hebel ayaa la soo qarxiye

iyo heblaayo muuqaal ayaa laga hayaa, ilaa eynu aragnay dad badan oo isu soo qaawaayo si ey caan u noqdaan.

Saaxiib dad kaas ma arkin miyaa aayadan:

إن الذين  يحبون أن تشيع الفاحشة في الذين ءآمنوا لهم عذابٌ أليم

(Kuwa jecel inee xumaanta faafto oo ka mid ah kuwa (xaqa) rumeeye waxaa u sugnaaday cadaab daran)

Saaxiib caanimadu waa cudur ka mid ah cudurada nafsadeed ee dadka ku dhaca, ee ilaahey ka magan gal inoo kaa hayo.

**Saaxiib ugu yaraan hadii aadan ka tagi karin wanaag kuu waara, haka tagin xumaan kuu waarta.**

“Hadii in lagu raali galiyo aadan jecleen, adiguba gafafka aad dadka kale u geysaneysaa sidaas oo kale ayey u xanuun badan yihiin„

Saaxiib hadii ey raali galinta dadka ku xeeran ku dhibeyso, ogsoonow in ey dadkane raali galintaada dhibeyso, oo waxa aad wada tihiin insaan dareema leh, oo adiga wax baad ka xanuunsataa sidaa oo kale waxbaa ku farxad galiyo, sidaa si la mid ah dadka waxbaa farxad galiyo, waxne wey caro galiyaan, ee dadka dareemahooda inta xanuujiso ha oran sidee lee xanuujin karaa, ka dibne lee raali galin karaa.

Saaxiib alle waxa uu yiri:

**إن يمسسكم قرحٌ فقد مس القوم قرحٌ مثله**

**(Haduu idin taabtay dhib, dhab ahaana wuu taabtay qoomka dhaawac la mid ah).**

Saaxiib xanuunka aad dareentay marka uu hebal qalbigaada ama sharaftaada dhaawacay camal, ayee dareentay heblaayo markii aad qalbigeedii ama sharafteedii dhaawaceysay, waxa hada kugu dhacayo waa xanuun aad hore qof ugu geysatay, oo qof walba waa uu helaa waxa uu geystay, ha dheeraato ama ha dhawaato, balse hadii aadan qof waligaa dhaawacin waxa ey kuugu dhaceysaa arintaan ku heysata, si aad u noqoto qof adag oo duufaanada dunida dhabanaya ee dhayal ku liici (ridi) karin.

**Saaxiib raali galinta aqbal ama cidna ha wax yeeleyn.**

“Laba arin ayaa cayima shaqsiyadaada waana samirkaada marka aadan waxba heysan, iyo hab dhaqankaada marka aad wax walba heysato„

Saaxiib hadii aad ila socoto buuga xikmadii ugu horeysay iyo tii labaad ayaa uga hadalnay samirka iyo wax weydiisiga iyo hantiilaha iyo sida oo la cagtiisa ugu takri falo inee ka dhigeyso mid maamuusan ama mid duli ah balse inta waxaan kugu sheegaa dhowr daliil oo intii hore kuu raacayo uun.

Saaxiib qofka marka uu is baro inoo dadka wax weydiisan, dadka wey jeclaanayaan sida oo nabiga (csw) ka dhawaajiye:

**وزهد في ما أيد الناس يحبك الناس**

(K**a tag waxa dadka gacmahooda ku jira, dad_markaas_wey ku jeclaane**)

Saaxiib gabay carbeed ayaa ahaay:

*والله يغضب إن تركة سئله*

**Alle woo caroodaa marka aad wax weydiisigiisa ka tagto.**

*وبني آءدم حين تسئل يغضب*

**Ina nabi aadana marka aad wax weydiisato ayoo caroodaa.**

Soomaalidane waxa ey ku maah maaheen:

**Barya badan iyo bukaan badan waa leesku nacaa.**

Saaxiib marka aad waxba heysan ku sabar heyntaada yar, marka aad wax heysata neh, inta uu alle ku siiye dadka wax ka sii wey kuu barakoobi ee.

“Mar walba diyaar u ahaaw fajaciso nolashu waa wada kadisyo dhan walbane wey kaaga iman kartaaye„

Saaxiib mar walbe waa in eynu xasuusanaa geerida, oo ah fajicisada ugu weyn dunidan eynu maanta ku nool nahay allane (swc) wax oo ka yiri:

**فأصابتكم مصيبة الموت**

**(Markaa ee idiin heleesho geerida musiibadeeda)**

Saaxiib maahin in eynu nolosheena oo dhan ka dhigno wax kama jiraan, hadii eynu weyno ama inaga dhinto qof eynu jecel nahay, waalid ha ahaado ama xaas wanaagsan oo naxariis iyo jeceylba ka helnay, waayo geerida waa sunaha adaamaha, oo dunidan anagu marti ayeynu ku nahay halka eynu lee nahay

waa meesha eynu shaqeesano oo ah (jano ama naar)

Alle (swc) waxa oo ka yiri geerida:

**كل نفس ذآئقة الموت**

(**Naf walba geeri ayey dhadhamin**)

Saaxiib nabiga (scw) asiga oo geerida ka hadlaya ayaa yiri:

**أكثروأ ذكر هاذم اللذات**

(**Badiya sheeg sheegida kan macaanka jaro_micnaha_geerida**)

Saaxiib nabiga (scw) u fiirso inta oo noolaa waxa uu waaye adeerkiisa, xaaskiisa, ubadkiisa, iyo maagaaladii uu

ku soo koray, hadane waa kanaa saaxiibadiisa asaga oo sabarsiinayo.

Saaxiib kaga dayo nabiyada sabarka, waa Kan nabi ayuub (csw) oo xanuunsanaye 18 sano hadane wali nolosha kama rajo dhigin.

Alle waxa uu ka yiri rususha:

**أولئك الذين هدى الله فبهدىهم اُقتده**

**(Kuwaas waa kuwa oo alle hanuuniye ee hanuun kooda ku dayda)**

**Saaxiib nabi muxamad uga dayo sabarka nabi yuusuf uga dayo dhowrsanaanta nabi nuux uga dayo dulqaadka dhamaan nabiyada ku dayo oo dhabahooda qaad.**

“Waligaa ha quusan maalin ayuun baad heleysaa waxa aad ku hamineyso ee„

Saaxiib inaa quusato waa bilawga guul daro kaste oo ku soo gaarto, ha ahaato guul daro aduun iyo mid aaqiroba.

Saaxiib hadii aad ka quusato wax aad gacanta ku heysay shaqo ama wax yaabo kale haba ahaado ee, maalinta aad ka quusatay ayaa kuugu danbeyso waxaas inoo agtaada ku waaro, sido kale marka aad danbiyo badan inta gasho aad alle ka quusatid aaqiradaada maalintaas ayaa ku guuldareystay.

Saaxiib sidee u quusanee alle asiga oo ku leh:

**لاتقنطوا من رحمة الله**

(**Haka quusanina raxmada alle**).

“Hadii aad aragto qof arin kaaga fiican, ogoow in uu sameeyo arin aadan adigu sameen„

Saaxiib hadii aad aragtid qof saaxiibkaa ah oo meela badan kaaga wanaagsan, ogoow waxa uu sameeyaa wax aadan adigu sameen tusaale: hadii aad aragtid saaxiibkaa oo waxbarashada kaaga sareeyo, ogoow inoo kaa wax aqris badan yahay ama kaaga yara fahan badan yahay, ama hadii aad aragtid saaxibkaa oo dhanka cibaadada kaaga wanaagsan, ogoow in aanu halkan ku soo gaarin in uu dhaho salaada ha dhow ayaa dukan, ee uu ku soo gaaray xili hore inoo firaashkiisa ka kaco, oo waqtiyada qaarne ey la tagi jirtay hurdada xilina uu nafta diriq ku kicin jiray, ilaa uu heerkan soo gaaray, alle asiga oo ka hadlaya

qofka meel hormar ka gaara in aanu si dhayal ah ku gaarin ayuu yiri:

وجعلنامنـهم أئمـةً يـهدون بأمرنـا لماصبروا

(Waxaan ka yeelnay kuwa ka mid ah_dadka_ hor joogyo_hogaamiya yaal_ si ey ugu hagaan amarkeena goortii ey sabreen)

Saaxiib wax dhayal lagu gaaro ma jiro ha ahaado: inaa noqoto nin cibaado badan ama gabar cibaado badan, ama ganacsade weyn, ama dhaqtar weyn ama shiiq weyn, ma jiro dhan nolosha ka mid ah oo aan dhib laheen, nolosha kaliya ee aan dhinac walba dhibka ka laheen waxa ey taalaa janada, iyada xata shaqo iyo dadaal ayee rabta ee u dadaal

nolosha danbe adiga oo meesha ka saareen noloshaan aduun, waayo alle waxa uu yiri:

وبتغ فيمآ اتىك الله الدار الأخرة

(**Ku dalab waxa oo alle ku siiye gurigaada aaqiro**)

Alle isla aayada ayoo ku yiri:

ولاتنس نصيبك من الدنيا

(**Hana hilmaamin qeybtaada aduunka**)

Saaxiib alle aayadan waxa oo inoogu sheegay in marka hore aaqiradeena xooga saarno, waxa aaqiradeena inaga caawinayane aan ku dadaalno, sida in aan ubad wanaagsan dunida ku soo kor dhino.

“Duruufaha ma xukumi kartid se afkaartaada adiga ayaa xukumi karo„

Saaxiib duruufaha dunida iyo is bad badalka waqtiga adigu si walba oo hor mar u gaartid ma xukumi kartid, balse waxa aad aaminsan tahay adiga ayaa xukumi Kara, tusaalene waxaa kuugu filan:

Bilaal binu rawaax (rc) marka uu islaamayay waxa uu ahaay adoon, oo maalin kaste saxaraha maka iyo dhagaxdeeda lagu dul cadaabo, bilaal ma awoodin in uu duruufta iyo waqtiga gudbiyo, balse waxa uu awooday in uu muslim nimadiisa ku sii dhaganaado, ilaa laga gaarayo waqtiga ey muslimiinta maka furan doonaan, waana ey dhacday oo waqtigu waxa uu socdaba waakaas

bilaal oo dhakada sare ee kacbada saaran waliba asiga oo ka eedaamaya.

**Saaxiib waqtigaan adag wuu tagi ee yoo kugu dhaafin adiga oo lagaa haayo calaacal iyo sabar la, aan.**

“Si kasta oo ay xaaladuhu noqdaan filashadaada wanaaga ha sareeyo„

Saaxiib mar kaste oo nolosha aad dhanka wanaagsan ka eegto ayadane dhanka wanaagsan ayee iska kaa tusee, oo qofka nolosha dhanka adag ka eega waa ey la adakaan nolosha oo dhami.

Saaxiib bal u fiirso ninkii dilay 99 nin ee aaday ninkii caabidka ahaay ka dib ku yiri ma ii furan tahay towbad, ee marka uu maya yiri asigane 100 uga dhigay ka dib aaday shiiq caalim ah, ka dib ku yiri 100 qof ayaa dilay ee towbad ma ii furan tahay, shiiqiina ugu jaawabay haa markii uu towbad keenayne ku amray meesha uu dadka kulaaye inoo ka tago ee uu aado magaalo kale oo aanay dadku garaneyn inoo 100 dilay, ka dib magaalkii

uu u socday markey kala bar uga dhimantahay, ayee wadada geerida ugu timi ka dib waxaa ku dooday dushiisa malaa,igta raxmada iyo kuwa cadaabta ugu danbeen waxaa loo xukumay malaa,igta raxmada, maadaamo uu towbad layimi.

Saaxiib waxaan sheekadan dheerta ah kaaga sheekeeye ayaa layaaban tahay umaleenaa, bal ufiirso nin dilay 100 qof ayaa nolosha ka fiirinaye dhanka wanaagsan, oo ah in uu alle u danbi dhaafi karo danbi walba uu galo, ka dib fikirkiisaas wanaagsanaa waxa uu ku helay wanaag oo ah, in janada alle loo xukumo asiga oo dilay 100 qof.

“Ha sugin baraaraha si aad u dhoolacadeyso ee dhoolacadeey si uu baraaraha kuugu

yimaado„

Saaxiib ma jiraan farxad ama baraare iska yimaada, ee waxaa jira farxad la kasbado ka dib dadaal badan iyo rafaad dheer.

Tusaale: marka aad dooneyso farxada qalin badalashada ee heerka sare ee iskuulka, waxa aad u baahan tahay in aad u sabarto modo 12 sano ah, marka lagaa helo sabarkaas adigane qalin badalashada waxa ey ku siin farxad ah inaa tahay qof hormar sameeye, waxa ey kugu dhiiragaline inaa dadaalka halkaa ka sii wado, alle waxa uu yiri:

فإن مع العسر يسراً

(**Culees kaste la jirkii waxaa ahaaday fudeed**)

Saaxiib wax walba oo farxad laga helaa waxaa ka horeeya dhibtood, ha yaraado ama habato ee, tusaale: qalin jabinta farxadeeda waxaa ka horeeya habeena badan oo loo dhafro, guurka farxadiisa waxaa ka horeeya shaqa adag iyo aruurinta lacagtii lagu guursan lahaay, xataa inaa raali ahaanshaha alle hanato waxaa ka horeyso habeena badan oo saalaad aad ku daasho.

Soomaalidane waxa ey ku maah maahdaa:

Ninaa shaqeysan shaax waa ka xaaraan

Saaxiib farxada laguu sheegayo waxa ey ku dhax jirtaa dhibtoodka, qof aan farxada raadine ma helo.

“Waxaa jiro xiliyo aynu u aragno in ey yihiin gaba gabadii, ka dibne eynu ogaano in ey yihiin bilowgii„

Saaxiib qof kaste waxa soo marta maalin uu is lahaay maanta ayaa nolosha kuugu danbeyso, dhacdada maalintaa soo martayne waxa ey u noqotaa xasuus la soo dhaafay.

Tusaale: saaxiib hadii aad booska nabi (yuunus) ku jiri laheed maxaad is oran laheed? Waa hubaal waxaa iigu jawaabi laheed nolol rajo kama yeesheen aniga oo bad weyn dhax deeda leegu tuuray ka dib uu libiri isii laqay.

**Saaxiib adiga xataa wey ku soo mareen maalmo aad is la heed nolosha maanta ayaa kuugu danbeyso, sida inaa xanuunsatay ama aad weyday qof nolosha kugu wehlinaye, sida hooyo ama aabe ama xaaji ama xaas wanaagsan.**

“Hadii aad qof kalsooni buuxda siiso, qof kuu waarayo ayaad heli ama cashir kuu waaraya„

Saaxiib waa hubaal hadii aad qof siiso kalsooni, aadna ku dhahdo inta adiga ayaa kugu ogahay, oo kama shaki qabo inta xagaada leega soo maro in lee gowraco ama lee ceebeysto, ka dibne ee dhacdo in dhankiisa inta lagaa soo maro dhabarka lagaa kala jabiyo ama dhaawac xoogan ku soo gaaro, ogoow dhaawacaas waxa uu kuu noqon doonaa casharka kuu waara, oo waligaa waad salaaxi doontaa dhaawacaas ama waad xasuusan doontaa jabkaas ku soo gaaray, balse hadii uu qofkaas noqdo mid booskiisa ka soo baxa dhankiisa lagaa soo mari waayo, waxa aad heshay qof

kuu waara, ha ahaado saaxiib ama gacaliye.

Saaxiib jooji inaa qof kaste ku kalsoonaato, maadaama eynu noolnahay waayo qiyaanadu caadi dadka agtooda ka noqotay, ogoowne inaa noolnahay waayo beentu neefta camal u adeegsano nasiib xumo.

Saaxiib dadka oo dhan ma wada xumo ee dadka aamin kan doonayo inoo ku qiyaameeyane alle u daay, allane waxa uu yiri:

**وإن يريدوٓاْ أن يخدعوك فإن حسبك الله**

**(Hadii ey doonaan iney ku dhagraan alle ayaa kugu filan)**

**Saaxiib cid kalsoonidaada u qalanta sii ilaaheyna u talasaaro.**

“Arimaha garaad ayaa lagu xaliyaa ee xoog laguma xaliyo„

Saaxiib waxaan si wacan u oganahay in arihama ama mushkiladaha lagu xalin xoog ee lagu xaliyo garaad quman, tusaale: hadii ey is qabtaan laba lamaane waxaa lama huraan ah in xal dag dag ah loo keeno waxa leesku qabtay, sida in labada lamaane mid tanaazulo ama raali galin bixiyo, ma ahan qof kaste inoo xoog wax ku xali is dhaho, se hadii ey taasi dhacdo, gurigaa waa uu burburi xariikaasine waa uu soo af meermi.

Nabigane (scw) wax oo yiri: gabadha waxaa laga abuuray feer qaloocan hadii aad doontid inaa toosiso waa ey jabi.

**Saaxiib waligaa adigoo wax xal ku heli karo xoog haku raadin.**

“Saaxiibada qaar waa sida cunada oo mar walba waad tabeysaa, qaarne waa sida daawada oo marka aad bukooto ayaad tabi, qaarne waa sida bukaanka oo waligaa uma baahaneysid„

Saaxiib marka ey tahay saaxiibada waa sadaxdaan nuuc, waxaa jiro saaxiib mar kaste aad jeceshahay la joogistiisa ama la dalxiiskiisa, oo ey idisku kiin baxdo wada sheekeysiga iyo wada shaqeynta, iyo saaxiib mararka qaar aad u baaheyso tusaale ahaan, saaxiib ka shaqeeyo xarumaha dowlada mid ka mid ah, marka aad u baahato ama ey dan kaa gasho dhanka dowlada waxaa lama huraan ah inaa u baahato saaxiibka, iyo saaxiib aad waligaa u baahaneyn sida saaxiibka fasalka iskuulka ama jaamacada nafta kuugu keenay, ee ku gaarsiiye heer marka aad kor ka aragto u ganbiso wadada uu marayo.

“Hadii aadan awoodin qof in aad wax tarto waxba ha u geeysan„

Saaxiib hadii aadan awoodin in aad agoonka wax siiso, ugu yaraan inta uu heesto ha hunguriyeen.

Saaxiib hadii aadan awoodin qofka culeeska wado inaa culeeska ka qafiifiso, ugu yaraan culeeskaada ka heyso.

Saaxiib hadii aadan awoodin balanta aad qaadeyso inaa oofiso, ugu yaraan ha qaadin si aadan dadka u qalbi jabin.

Saaxiib hadii aadan awoodin inaa dadka gacan qabato, ugu yaraan haka hor joogsan dadkii gacan qaban lahaay.

**Saaxiib hadii aadan dadka xaqa ugu yeeri Karin ugu yaraan baadilka ha ugu yeerin**.

"Ha murugoon hadii qof aadan ka fileyn ku xumeeyo, mid aadan ka fileyn ayaa ku ilowsiiyo oo kaa meyro xumaantaase"

Saaxiib ma waxaa wali ka murugoonoosa in oo hebel ku qiyaamay oo balanki kaaga baxay.

Saaxiib ma waxaa hilmaamtay in uu hebel yahay (aadame) oo ey wax walba ka suuroobaan.

Saaxiib hadii aan cabaar kuu waramo dunidan waxaa soo maray dad dilay aabahood, si ey xilka ee hayaan uga dhax laan tusaale: poqorkii la oran jiray (namruud) ee caalamka oo dhan ka taliye, waxaa la sheegaa si uu poqor u noqdo darted ayuu u dilay aabihii dhalay marka adiga filashadaada maxaa waaye? hadii aabe dhan xil daraadii loo dilay, hadii aad I leedahay war dadkaa gaalo

ayee ahaayeen bal inoo keen muslimiinta dowladii la oran jiray (**mamaalikta**) ee masar ka dhisneed sanado yar ayaa waxaa soo maray poqoro badan sababtane waxa ee eheed shiqoolo xilka lees kaga dilanaye.

Saaxiib ilaa iyo wali hadii aadan I fahanmin tusaale dhaw ayaan ku siin.

Nabi yuusuf (csw) waxaa ceelka ku riday walaalihii si ey u helaan jeceelka aabahood,

Saaxiib wax aad walaalahaa kaa weyn ka filan laheed maahin, balse yuusuf walaalihii wey sameeyen, balse mid

uusan ka filaneen wanaag ayaa naagtiisa ku yiri, sida uu alle inooga waramay:

أكرمي مثويه

(**Wanaaji hooygiisa**)

Saaxiib hadii uu qof ku qiyaamo iska cafi oo noloshaada hore u wado, waa hubaal waxa aad heli doontaa qof ku wanaajiyo.

Saaxiib qof ku xumeeye dartii, hadii uu saan dhan kaaga murujinayo, maxaa sidaan oo kale uga murugoon weyday danbiyada aad alle ka gashay? oo ilaa iyo hada aad ka towbad keenin.

**Saaxiib waligaa noloshaada cid aan alle eheen haku xirin waa hubaal in aad farxad ku noolaan.**

“Dhamaanteen caadi ayeynu la nahay kuwa aan Ina aqoon, kibirlowyo ayeynu la nahay kuwa Ina xasdaya, waynu la wanaagsanahay kuwa Ina jecel„

Saaxiib dadka waa uun sadaxdaan qeybood:

Qeyb waa kuwo xog aan sidaa u buurneen inaga haya oo caadi ahaan wax inooga sheegaya sida: hebal wax xumaan ah kuma arag waa uun qof wanaagsan.

Qeybna waa kuwo xiqdi iyo xaasid nimo laabta inoogu haya, oo marka inalaga wareysto xumaanteena uun sheega.

Qeybta ugu danbeysane waa kuwo xog dheeraad ah inaga haya, oo marka wax nalaga weydiiyo oranaya: hebel qof ka wanaagsan inoo jiro uma maleenayo waayo waa qof dabeecad leh oo lala

dhaqmi karo, qeybtane waa dadka ina jecel sida: hooyo aabe ama walaal amaba saaxiib ama saaxiibad ama xaaji ama xaajiyad.

## Saaxiib

**Noqo qof wanaagsan mar walba iyo xaalad walba iyo goob walba.**

Saaxiib aqlaaqdaada marka aad cadawgaada la dagaaleyso, iyo wanaagaada marka dad aad aqoon la dhaqmeyso, iyo ixtiraamidaada dad aad jeceshahay ayaa kaa dhigayo sida tan:

**Qof wanaagsan mar walba iyo xaalad walba iyo goob walba.**

“Yaanu ku murugo galin qof aan qiimigaaga garaneyn indhooluhuba hadii uu dheeman taabto dhagax ayunbuu u maleyn„

Saaxiib wax wlba qiimo ayee lee yihiin, jeceylka qiimo ayuu lee yahay marka qof u qalmo la siiyo, saaxiibtinimadu qiimo ayee lee dahay marka qof saaxiib wax ka yaqaana lala saaxiibo, naceybka qiimo ayuu lee yahay marka aad naceyso xumaha uu alle neceb yahay, sidaa oo kale, naftaada qiimo ayee lee dahay marka aad geeyso booska loogu tala galay.

Saaxiib hadii ey dadku qiimahaada garan waayayaan, yaanay ku murugo galin, sababtu waa in ey dadku fiiriyaan qofkan inta lacag uu heesto, inta cunug uu dhalay, inta baasa boor uu heysto, iyo cida uu ka soo jeedo ma qabiil laan

dheeraa mise qabiil laan gaab ah, balse alle intaaba ma qiimeeyo, ee waxa uu qiimeeyaa kan xagiisa ugu cabsida badan sida uu alle inooga waramay:

إن أكرمكم عندالله أتقكم

(**Kan idinku sharafta badan alle agtiisa waa kan idinku cabsida badan**)

Saaxiib qiimaha yuusuf walaalahii mey garan, yoonisne qoomkiisa ma garan qiimahiisa markii hore, sidaa oo kale nabi muxamad (scw) qiimihiisa ma garan qureysh bilogii hore ilaa uu furtay (mako).

**Saaxiib qiimahaada hadii uu qof garan waayo waxaa garanaya alle ee ha murugoon.**

“Hadii cadaalada laga dhabeeyo, xataa xoolaha ayaa nidaamka ilaaliya oo aqbala„

Saaxiib xikmadaan faah faahin dheer uma baahna, ee tusaalooyin kaan yar yar lee ku fahan.

Alle waxa uu yiri:

**ولكم في القصاص حيوة**

(**Waxaa idinku sugnaaday qisaasta_aar gudashada_nolol**)

Saaxiib in qof loo dilo qof kale xagee nolol uga jirtaa?

Saaxiib hadii qofkaan wax dilay loo dilo kii uu dilay, waxaa xasilayo marka koowaad dadkiisa marka labaadne dadka waxa ey iska ilaalin doonaan in ey wax dilaan, oo xagaa waxa eynu ku heysanaa laba faa, iido mida koowaad waa in eynu

cadaalad ku noolaanaa oo qofkii wax u geystaa qof waa looga abaal gudi, tan labaadne waa in eynu nolol amni ah helno, oo qofkii qof dilaa waxaa u danbeyneyso dil, oo majirayo qof ku fakaraya inoo qof dilo.

Saaxiib qisada (cumar binu cabdi caziiz) waa maqashay umaleenaa, waxa uu ahaay hogaamiye caadil ah oo waqtigiisa cadaalada waxa ey gaartay in ey xataa duur joogta iyo xoolaha kale isla daaqaan, maalin ayaa waxaa dhacday in uu ari cunay dhurwaay waqtigii cumar binu cabdi caziiz ka dib naag meesha waxa ka dhacaya arkeysay ayaa tiri: maanta waxaa dhintay cumar binu cabdi

caziiz dadkii meesha ka ag dhawaay, markii ey warkeeda baareen waxa ey soo ogaadeen in ey run sheegtay naagtii.

Saaxiib aayada eynu kor ku xusnay iyo qisadaan waxa aan kuugu soo qaatay inaa fahanto hadii cadaalada laga dhabeeyo in eynu heleeno nolol wanaagsan, oo xataa duur joogta aan ka nabad heli doono.

**Saaxiib hadii eynu isku maamulno kutaabka alle oo cadaalada oo dhami ey ka buuxdo, waa hubaal in la arki doono wadankeena oo dhaqaale ahaan, amni ahaan iyo sharaf ahaanba dunida ugu sare mare, balse dhibka waxa uu ka jiraa madaxdeena iyo hogaanka muslimiinta.**

"Hadii aad nolosha ku dhibaatooto ha murugon laga yaabaa in uu alle doonayo in uu maqlo codkaaga adiga oo baryaya 'ee'"

Saaxiib mararka qaar alle waxa oo kugu imtixaanaa xanuuno iyo dhibaatooyin, taas macnaheedu maahin in uu alle ku neceb yahay, ee macnaheedu waxa ey tahay alle waxa uu doonayaa in uu ku imtixaano, sida uu alle inoo sheegay:

ليبلوكم أيكم أحسن عملا

(**Soo idiin imtixaano kiinee camal wanaagsan**)

Saaxiib dadka waxaa ugu imtixaan badnaay nabiyada (csw) sababtuna waa inuu alle jecel yahay, bal u fiirso qisada nabi yuunuf markii uu qoomkiisa ka carooday ee uu doontii raacay, ka dib ee u soo baxday in lagu tuuro bada, markii lagu tuurayna uu libirigii laqay, libirigiina

uu bada gunteeda hoose u dhaadhacay waxa uu ku dhax sugnaay nabi yoonis (csw) mugdiyo sadax ah, mugdi waa kan bada, mugdina waa kan habeenka, mugdina waa kan caloosha libiriga, balse alle ayuu barye nabi yoonis, allane wuu ka aqbalay ducadiisa, bal u fiirso aayadaha uu alle ka yiri qisada nabi yoonis:

**فلولآ أنه كان من المسبحين**

**(Haduusan ka mid ahaan laheen kuwa tasbiixsada_alle xusa_)**

**للبث في بطنه إلى يوم يبعثون**

**(Waxoo ku nagaan lahaay calosha_libiriga_ilaa maalinta dadka la soo saarayo)**

Saaxiib alle inoo musiibo kugu imtixaano ayaa laga yaaba, asiga oo doonaya in uu maqlo waxa aad ku baryootameyso, ka dib uu ku siiyo waxa aad ka barisay, sidaas darteeda ayoo nabiga (scw) inoo baray ducooyin, si eynu u aqrino goorta ey dhibi ina qabsato.

Saaxiib marka ey dhibi ku qabsato u carar dhanka alle, oo alle ayaaba ina amray:

**ففروٓا الى الله**

**(Alle xagii u carara)**

**Saaxiib waqti walba alle xagii ahaaw, allane xagaada ayoo ahaan.**

“Hadii aad qof ku weydo hadal cadaantaada libin ayaad gaartay, oo garaadada liita ee muga yar runta ma xijiyaan„

Saaxiib agab walba oo maanta aynu aragno waxaa ka qiimo badan agabkii hore, tusaalane waxaa ugu qiimo badan, Kan dadkii hore, sida qisooyinka nabiyada iyo saxaabada iyo dadkii wanaagsanaay.

Saaxiib nabigeena muxamad (scw) tolkiisa waxa uu ku waaye, hadal cadaantiisa iyo inoo guto fariinta uu alle u soo dhiibay oo eheed:

لآ إله إلا الله

**(Ilaah xaq lagu caabudo ma jiro, alle mooye)**

Saaxiib adigane ma hal qof ayaa xaqa uga soo hor jeese, adiga oo doonayo hebelkaas inaa raali galiso, ha ahaado,

waalid ama walaal, amaba siyaasi kugu cid ah.

Saaxiib inaa dadka raali galiso waa yool aan sinaba loo gaari karin, balse inaa alle raali galiso ayaa ka sahlan.

**Saaxiib inta aad been qof ku raali galin laheed runtaada ku waay oo alle ku raali gali runtaadaas.**

**Saaxiib qishkaan iga hoo, hadal cadaantaada waxa eey kuu reebtaa, dad aanay kuu reebeen noloshaada oo dhan beentu.**

**Saaxiib runtaada waxaa kugu jeclaanaya dad muga garaadkooda xijin karo runtaada, ee waligaa runlowgaadaas ahaaw.**

“Murugada iyo niyad xumada waxa ey maankeena u qabsadaan hadba sida ey boorka u qabsadaan kutubteena

qu, raanka„

saaxiib marka aad noloshaada ku aragto murugo iyo niyad xumo, eeg dhanka kitaabkaada qu, raanka, hadii aad aragtid asiga oo booreystay xasuuso balankii alle ee ahaay:

**ومن أعرض عن ذكري فإن له معيشةً ضنكاً**

(**Ruuxa ka jeesta xuskeyga_quraanka_waxaa u sugnaaday nolon adag**)

Saaxiib murugada iyo nolosha adagi waxa ey ka bilaabman kitaabadeena quraanka oo booreysta, nolosha dagan ee xasiloona waxa ey ka bilaabataa, xuska alle iyo aqrinta kitaabkiisa quraanka, alle oo arintaas inooga wamaraya waxa uu yiri:

# ألابذكر الله تطمئن القلوب

## (Alle xuskiisa_quraankiisa_ayee quluubta ku xasishaa)

Saaxiib hadii aad rabtid in aad ku noolato nolol wanaagsan oo dagan, kaliya waxa aad u baahan tahay inaa maalin kaste aqriso quraanka ugu yaraan maalintii aqri hal bag oo kaliya, waa hubaal inee noloshu kuu sahlanaan doonto inta cimrigaada ka dhiman.

**Saaxiib qishkaan iga hoo, farxada eynu mareykanka iyo yurub ka raadeeno, waxa ey ku jirtaa aqrinta quraanka iyo ku dhaqankiisa.**

**Saaxiib sirta farxada waxa ey ku jitaa aqrinta quraanka iyo xuska alle saliga nabigane ku darso.**

“Waligaa ha ka xumaan wanaag aad cid tartay, oo aanay cidaasi u qalmin, ku faan saafinimada qalbigaaga, wanaagyadaadane ha

isku canaanan„

Saaxiib waligaa yaanay ku murugo galin wanaag aad qof ama umad u sameysay waliba iyada oo kaa tahay ilaahey dartii,

Tusaalane waxaa kuugu filan nabi yuusuf (csw) wanaagii uu boqorka u sameeye ee ahaay, inuu alle dartii uga dhowrsaday naagtiisa, ayaa ugu danbeyntii sababtay in xabsi loo taxaabo, balse qisada nabi yuusuf (csw) dhamaanteena kuma aanan arag asiga oo poqorka inta uu cuqdad u qaaday ka shalaaynaya wanaagii uu u sameeye, balse taa badalkeeda waxa eynu qisada nabi yuusuf (csw) ku aragnay asiga oo laga codsanayo inuu poqorkii xumeeye riyo u fasiro, waliba yuusuf uu ka codsanayo boqorka inuu u

dhiibo keedadka dhulka maadaama uu yahay mid xifdinayo cilmi u leh sida loo maareeyo keedadka dhulka.

Saaxiib adigane ma waxaa naftaada ku canaanee wanaag aad walaalkaa u sameysay, ama saaxiibkaa, ama gabadhaada (xaaskaada) amaba dadka aad jeceshahay ee aadka kuugu dhaw, ka dib inta ey wanaagaas garan waayeen ku xumeeyen.

**Saaxiib maxaa kuu diiday in aad ku faanto qalbi wacnaantaada iyo ruux wanaagsanaantaada iyo quruxda ey leedahay daacadnimadu.**

“Ha ka murugoon hadii dadka qaar kaa dheeraadaan oo kaa tagaan, laga yaabaa in uu ilaahey kaa aqbalay duco aad habeen tiri ilaahayow idhaafi wixii iidaranba„

Saaxiib mar kaste waxaa muhiin ah in aad nolosha dhinaca adag uun ka fiirin ee aad dhinaca wanaagsane ka eegto, si aad nolol iska fudud ugu noolaato, balse hadii nolosha aad ka heysato fikrad ah nolashu wey adag tahay iyo noloshaan aduun waa kadeed uun, waxa hubaal ah nolosha oo dhan waxa ey kugu noqee mid kadeed iyo kurbo socoto ah.

Saaxiib waxaa dhacdo mararka qaar in aan alle ka barino inoo nolosheena ka dheereeyo cid kaste oo dhib ku eh, ka dib uu alle inaga aqbalo ducadeena, ka dibne uu alle nolosheena ka bixiyo dad badan oo aan u heysanay inee yihiin,

dadka nolasheena oo dhami ey la, aantooda hore u socon karin.

Saaxiib hadii aad aragto qof aad jeceshay oo noloshaada ka baxaayo, ogoow alle inoo doonayo inuu kuugu badalo mid asaga kaaga wanaagsan oo kaaga qeer badan, hadii aad been ileedahayne u fiirso aayadaan:

**و عسى أن تكرهواْ شيئاً وهو خيرلكم**

(**Waxaa laga yaabaa inaa wax dhibsataan asaga oo qeyr idinku jiro**)

Saaxiib hadii uu kaa dheeraado gacaliye ama qof aad jeceshahay, ogoow alle (swc) in uu adoonkiisa ka qaadin wax ilaa adoonkaas waxa laga qaaday maslaxo ayaa ugu jirto.

“Wax walba marka aad siideyso, wey kufaan oo ciiraan, balse quraanka hadii aad siideyso adiga ayaa kufaya oo ciiraya„

Saaxiib waa laga yaabaa qof aad garab heysay marka aad garabkiisa ka baxdo inuu kufo oo garab istaagaada u baahdo, balse marka aad quraan aqriska garab marto, waxaa kuu bilaabmaya kufitaano aan dhamaad laheen taasne alle ayaa inoo sheegay:

**ومن أعرض عن ذكري فإن له معيشةً ضنكاً**

(**Ruuxa ka jeesta xuskeyga_quraanka_waxaa u sugnaaday nolon adag**)

Saaxiib kufitaanada iyo culeesyada nololeed ee ku soo wajahaya, waxa ey kuu tilmaamayaan inaa ka gaabisay aqrinta quraanka, qof kaste oo ka jeesta aqrinta quraanka iyo xuska alle nolol

adag ayaa sugeysa, qof kaste oo nolol wanaagsan doonayane, waxaa ku waa jib ah inoo aqrinta quraanka iyo xuska alle badiyo, waayo nolosha farxada iyo daganaashaha leh waxa ey ku dhax jirtaa quraanka sida uu alle inoo sheegay.

**ألابذكر الله تطمن القلوب**

**(Alle xuskiisa_quraankiisa_ayee quluubta ku xasishaa)**

Saaxiib hore ayaa kuugu soo faah faahiye mowduucaan ee buuga dib ugu laabo hadii faah faahin intaan ka balaaran rabtid.

“Ku raaxeyso wax yaabaha yar yar aad maanta heysato hadhow ayaad ogaan doontaa in ey ahaayeen wax yaabo waa weyne„

Saaxiib indhahaada ugu raaxey aqrinta quraanka iyo buugaagta wax tarka u leh, dhagahaadane ugu raaxey dhageysiga quraanka iyo doodaha iyo warbixinada wax tarka u leh, gacmahaadane ugu raaxey tasbiixda iyo caawinta miskiinta, lugahaadane ugu raaxey u socodka masjidka.

Saaxiib maalinka aad indhahaada weydo ayaad xaqiiqsan nimcada araga, maalinta aad lugahaada weydane waxa aad ogaan qiimaha ey luguhu kuu lahaayeen, maalinka uu naqasku ku dhibane waxa aad xasuusan nimcada neefsashada ee leedahay.

Saaxiib nimcooyinka aad heysato alle ugu mahdi kuna raaxeyso oo ku qanacsanaaw inta uu alle ku siiye, ogsoonow waxaa jiro dad uu alle intaa aanu siin iyo dad uu intaaba siiye.

Saaxiib qof kaste oo ku qanca alle inta uu siiye kuna mahdiyaa, alle woo u badiyaa oo u barakeeyaa.

**لئن شكرتم لأزيدنكم**

**(Hadii aad shukrisaan_mahdisaan_ waa idiin kor dhin)**

**Saaxiib inta aad heysato ku raaxeyso oo alle ugu Mahdi waa hubaal nimcadaas wey kuu badan.**

“Qof kastaaba wuu jecleystaa in uu mudo dheer noolaado balse ma jiro qof doonaya inuu gaboobo„

Saaxiib dhmaanteen waxaa hubaal ah in eynu jecel nahay nolol dheer, oo mid keen waxa uu jecel yahay in la cumri siiyo 1000 sano sida uu alle yiri:

**يود أحدهم لو يعمر ألف سنة**

**(Waxa uu jeclaan lahaay mid kood in la cumri siiyo kun sano)**

Saaxiib hadii aad I lee dahay maxaad aayadan u soo qaadatay gaalada ayee ka hadleyse?

Waxa aan ku lee yahay gaalada waxa ey jecel yihin cumri dheer si ey dhimashada cadaabka ka danbeya ciyoowtii u dhadhamin, balse dhamaan maqluuqu waxa ey jecel yihiin in ey nolol dheer noolaadan, si ey hantiile u noqdaan, si ey ubad badan u dhalaan, si ey camal badan uu alle raali ka yahay u shaqeystan, si

ey lamaan kooda waqti dheer oo farxad leh ula qaataan, si ey dunida ugu soo dalxiisaan, si ey dunida ugu soo kor dhiyaan wax qabadyo ugub iyo wixii intaaba la hal maala oo doonis aduun ah, ayaa dadka ku qasba in ey dunidan iyo noloshaba jeclaadaan.

Alle (swc) waxa oo ka yiri:

**فطال عليهم الأمد فقست قلوبهم**

**(Waxaa ku dheeraaday mudadii_ey jeceylka iyo bursadka aduunka hayeen_ka dib qalbiyadooda ayaa qalalay)**

Saaxiib cumriga dheer ee qofka loo celinayo caruun nimada nabiga (scw) alle ayoo ka magan gali jiray sida axaadiis badan ku soo aroortay, waxaa ka mid ah axaadiis kaan soo socda:

# وأعوذ بك من أن نرد إلى أرذل العمر

**(Allow waxaan kaa magan gali in noola celiyo cumriga kiisa liita_duqnimo)**

Saaxiib qofka si kaste uu lacag u heysto si walba uu jirkiisa ugu dadaalo hadii uu alle cumri dheer siiyo, waa hubaal maalin uun xaaladan duqnimada ah ee uu alle quraanka inoogu sheegay wuu gaari:

**ومنكم من يرد إلى أرذل العمر**

**(Waxaa idiinka mid ah kuwo loo celin cumriga kiisa hoose_liita)**

Saaxiin cumrigaada wanaajiso inta aad noshahay.

“Buugii ugu mudnaay

Ee aan aqriyay

Waa hooyadey„

Saaxiib badanaa caruurtu waxa ey qaadaan dhabaha waalidkooda haba ugu xoog badnaato hooyada ee, sababtuna waa in caruurka yari hooyadii waqti badan ku ag qaadanayo, halka aabaha uu waqti yar la qadanayo, tusaale: hooyadu guriga kama tagto maalintii oo dhan waana sida caadada eh, balse aabaha waxaa laga yaabaa in uu maalmo, bilo, sanado, cida ka maqnaado shaqo darteed.

Saaxiib hooya walba cunugeeda waxa uu noqdaa 100%90 sida ey tahay hooyadu, oo hadii ey tahay mid sadaqo badan, ubadkeeda saas ayoo noqon, hadii ey

tahay mid dadka dariska xaalkooda ka war heyso, ubadkuna sidaa ayuu noqon.

Saaxiib hadii aad dooneyso bari marka aad dhimato inoo cunugaada wax kuu sadaqeyo maanta bar sida wax loo bixiyo, Hadii aad dooneyso inoo kuu soo duceeyo maanta ku tarbiyadee inoo awoowa yaashii u duceeyo, hadii aad dooneyso inoo masaakiinta garab qabto maanta bar inta uu yar yahay sida maskiinta looga war qabo.

**Saaxiib warka hadii aan kuu soo koobo hooyadu cunugeeda waxa uu ka arko ayaa u tarbiyo ah, ee hooyo wanaagsan ubadkaada u door, si hadii uu alle ubad idin siiyo ee dabciga wanaagsan idinkaga dhax laan.**

“Yaanay ku murugo

galin in aad fashilantay mar hadii aad dib u

bilaabi karto„

Saaxiib fashilku woo nuucyo badan yahay, balse waxa uu iskugu soo aruuraa labo uun waana fashilka aduun iyo kan aaqiro, mid kaste hadii eynu goonidiisa u sharaxno waa sida tan:

Fashilka aduun: waa adiga oo ku guul dareystay waxbarashadaada, ganacsigaada, ama sii jiritaanka qoyskaada ama gurigaada.

Fashilka aaqirane: waa adiga oo dhanka wanaaga lagugu yaqaane, in aad hal mar kala wareegto, oo cibaadada iyo wanaaga ka dhax baxdo.

Saaxiib ogoow labadaba waxa ey lee yihiin dib u bilaabis, waase hadii aad ey

meesha taal sabab aad dib ugu bilaabi karto, sida: in aad hesho maal galin cusub ama aad hesho nolon aad dib ugu laabato cibaadadi iyo wanaagi aad ka dhax baxday.

Saaxiib ma jirto sabab aad ku quusan karto, oo aad dhabanada inta gacmaha isi saarato aad fadhi halkaa la yuurarsan kartaa, iyada oo jiraan wadooyin aad ganacsigaada dib ugu bilaabi karto ama aad dhanka alle ugu soo laaban karto.

Saaxiib xasuusnow alle inoo yiri: adoomankeeya nafahooda ku xad gudbayow alle naxariistiisa haka quusanina) hadii ey ahaan laheed ganacsi amaba danbi alle naxariistiisa haka quusanina.

“Wax kasta oo aad ku sugantahayba ahaaw qof wanaagsan„

Saaxiib wanaagaada sii haay marka lagu xiro adiga oo saxan dadkuna kaa qaladan yihiin, sida uu nabi yuusuf ba (csw) sameeye.

Saaxiib sii dhibrin iyo turis badnaaw marka lagu caayo ee lagu dhagaxeeyo, sida nabi muxamad (scw) uu sameeyaba.

Saaxiib sabar oo adkeyso marka ey xanuuno darani ku qabtaan, sida nabi ayuuba (csw) uu sameeye.

Saaxiib baari ahoow marka uu waalidkaa kugu xad gudbo oo uu kaa qaldamo, sida uu nabi ibraahimba (csw) sameeye.

**Saaxiib wanaaga sii haay xataa hadii ey dadku kugu caayaan wanaagaada, sida nabi luudba (csw) uu sameeye.**

“Ha wal walin hadii laguu qiri waayo waxa aad tahay, dadaalkaaga sii wad, heer aad gaarto in laguu qiro waxa aad tahay„

Saaxiib ma waxaad u murugooneysaa in laguu qiri waaye waxa aad tahay, hadii ey ahaan laheed, geesi, runlow, deeqsi, iyo wixii la halmaala oo wanaag ah.

Saaxiib ogoow hortaa nabi muxamad (scw) in loo qiri waaye nabi alle inoo yahay, ee xataa caay dabada la qabtay oo magaalkiisa laga eryay.

Saaxiib ogoow hadii laguu qiri waaye inaa dhowrsade tahay, hortaa in nabi yuusuf (csw) lagu eedeeye inoo naagtii soo korisay damcay oo xoogi rabay.

Saaxiib nabi muxamadne waa kaas maka furtay, yuusufne waa kaas poqorka ceeb ka saliimka ah noqday, adiguna iska sugo libintaada.

"Quruxda dhabta ahi
waa shaqsiyad wanaaga
dabci samaanta iyo
ruuxda daahirka ah„

Saaxiib quruxda dhabta ah qofka gudihiisa ayee ka oogan tahay, tusaale hadii aan ku siiyane, bal u fiirso shaqsiyad wanaaga nabi nuux (csw) waxa oo tolkiisa waanaaye 1000 sano oo dhiman 50 sano, waliba inta uu waanaaye marka ey arkaan heer waxa ey gaareen ey dhagaha faraha ka gashtaan dharkoodane iskaga daboolaan, si eysan u maqal waanadiisa una arag asaga dhan.

Sido kale bal u fiirso dabci samaanta nabigeena muxamad (csw) markii uu alle soo diray tolkii wey dhibeen oo woo ka harsan waaye ilaa ey magaaladii uu udhashay ey ka saareen, balse markii uu

furtay mako waxa uu ku yir: iska taga kuwo la sii daaye ayaa maanta tihiine.

Sido kale bal u fiirso ruuxda daahirka ee alle ugu deeqay nabi yuusuf (csw) markii ey naagtii poqorka damacday asigane uu ka diiday damaceedii xumaay, waxa ey baxar u galisay lugaha, oo wey ka been abuuratay, waxa eyna si af cad ah ugu sheegtay naagihii wax ka sheegayay iyada, in hadii uusan waxa ey rabto u sameen xabsi u taxaabi doonto, balse nabi yuusuf (csw) xabsi ayoo ka door biday inoo xumaantaas ku dhaco.

**Saaxiib shaqsiyadaada iyo dabcigaaga iyo daahirnimda ruuxdaa ku dadaal oo ilaasho.**

“Dadku wey isbadal badan yihiin ee qiimigaaga ha ka dhax raadin wajiyada dadka„

Saaxiib waxaad ila fiirisaa tusaalayaasha soo socda walbiga si qoto dheer.

Saaxiib nabi muxamad (scw) qureysh waxa ey ku dhihi jireen: runlow, amiin, balse marka uu fariinta alle ula yimi, waa kowaan ayaga oo leh amiinkii iyo runlowgoodii shalay waa beenlow:

**فقالوأْ سحر كذاب**

**(Waxee dhaheen waa sixroole beenlow ah)**

Saaxiib mar kale waa kan nabi saalix (csw) oo inta tolkii fariinta alle ula yimi ku dhaheen sida tan:

**قالوأيصلح قدكنت فينا مرجواً قبل هذآ**

(**Waxee dhaheen saalaxow waxa aad eheed dhaxdeena mid la rajeeyo_sharfo_ arinkaan ka hor**)

Saaxiib ronlowgii waxaa u danbeeye beenlow in la dhaho, amiinkiina waxaa u danbeeye in la dhaho woo waalan yahay.

**Saaxiib dadku sidaa ayee isku rog rogaan oo kii shalay kulahaay halyeey, ayaa maanta ku dhaahyo fulay, kii aqoonta kugu amaanayane jaahil ayoo ku dhihi, kii deeqsiga kugu amaanayane baqiil gacan adag ayoo kugu dhaleeceen, ee qaad wadada nabi muxamad (scw) iyo wadada nabi saalix (csw) oo ah in aad caayda dadka dhaha ka fureysato oo aad hadafkaada weyn eegato.**

“Mar kaste oo ey hiigsiyadeenu waa weynaadaan, jidka ayaa daba dheeraada„

Saaxiib hiigsiyadu waa ey fara badan yihiin, balse anaga waxa aan ka soo qaadan hal tusaale oo aan ka dhalin ahaan wax iskula fahmeeno waana wax barashada, tusaale hadii aad dooneyso in aad noqoto (barafasoor) waxa aad u baahan tahay wado dheer oo caqabado badan inaa soo marto, hadii ey ahaan laheed in aad iskuulka qeybta (hoose, dhexe, sare) iyo qeybaha kala duwan ee jaamacada inaa soo marto, si aad uga dhabeyso hamigaada ah in aad noqoto (barafasoor).

Saaxiib ogoow meel kaste oo nolosha ahine sidaa oo kale waaye, oo hadii ganacsade weyn inaa noqoto rabtid,

waxa aad isku diyaarisaa wada dheer oo leh qasaaro badan iyo guulaba.

Ma jiro qof (barafasoor) ku noqday hal habeen, ma jiro qof (ganacsade weyn) hal maalin ku noqday, balse waxaa jiro dad aqoon yahano ku noqday dadaal badan iyo habeeno badan oo la soo jeeday iyo kuwo kale oo sanado badan ka dib ganacsadayaal waa weyn noqday.

Saaxiib qaar saxaabada nabiga (scw) ka mid ah ayaa see dagaal ugu jireen dhahay waa goorma gargaarka alle, nabigane ugu war celiye: gar gaarka alle woo dhaw yahay.

Saaxiib gar gaarka alle wuu dhaw yahay, ee dhabar adeeg muuji inta uu ka imaanayo.

“Dhulka waxa yaala wey ku filanyihiin dadka oo dhan baahidooda, balse dhulka mayaalo dadka oo dhan damacooda wax ku filani„

Saaxiib marka kowaad waxa eynu qalad fahanay irsaaqda, oo waxa eynu irsaaqda u aragnay kaliya inee tahay wax la cuno, balse waxa eynu hilmaamnay irsaaqda alle iney qeybo badan tahay oo kala jaadad duwan tahay, sida hantida, ubadka, quruxda, caafimaadka, cimriga, iyo wixii kale oo aad ku darsan karto ileen irsaaqda lama koobi karo.

Saaxiib alle asiga oo irsaaqda ka hadlayo waxa uu yiri:

**والله فضل بعضكم على بعض في الرزق**

**(Alle woo ka fadilay qaarkiin qaarka kale xaga risqiga)**

Saaxiib hadii uu alle ku siin maal badan, ogoow in uu dhanka kale kaa siiye ubad ama caafimaad, hadii uu ubad ku siina ogoow in uu ku siiye, maal fara badan ama caafimaad.

Saaxiib aadamaha waa mid damac badan sida oo nabiga inoo sheegay:

لو أن لابن آدم وادياً من ذهبٍ أحب أن يكون له واديان ولن يملأفاهُ إلاترابً

**(Hadii uu Ina nabi aadan u sugnaan lahaay waadi_tog_ dahab ah waxa oo jecleysan lahaay inee u sugnaan lahaayeen laba waadi oo kale mana buuxaayo afkiisa_damaciisa_ caro mooyaane)**

Saaxiib heeyntaada yar ku qanac farxad waa heli.

“Naftaadu waa markab kaaga oo hadii aad adigu fuushaa waad bad baadi, hadii ey iyadu ku fuushane waad halaagsami„

Saaxiib waxa eynu aaminsanahay in ibliis oo kaliya dadka naarta ku hago, balse aan su, aal yar ku weydiiye, tolow yoo ahaay qofkii ibliis ku dhaliye in uu alle ku caasiyo?

Saaxiib waxa aad istiri ayaan umaleenaa naftiisa ayaa ku dhalisay in uu alle ku caasiyo, waa sax jawaabtaada oo alle waxa uu yiri:

**إن النفس لأمّارةٌ بالسوءِ**

(**Naftu waa mid faris badan xumaha**)

Saaxiib marka hore waa in aan alle ka magan galnaa nafaheena ka dibne ibliis aan ka magan galnaa, oo ibliis wadada

oo xumaha inoogu soo maraa waa nafaheena.

Alle waxa uu yiri:

**واما من خاف مقام ربه ونهى النفس عن الهوى**

(**Ruuxa ka baqa hor istaaga eebe naftana hawada_xumaha_ ka reebo**)

**فإن الجنة هي المأْوى**

**(Janada ayaa hooygooda ah)**

Saaxiib hadii aad naftaada xumaha ka reebto, ibliisne kuguma soo dhiiraayo si uu kuu lumiyo, naftaadane waad hanan balse hadii aad naftaada daba gasho oo aad hogaamiye ka dhigato, waxa ey kuu xero galin ibliis, sidaasne waxa aad uga mid noqon kuwa lumay.

**Saaxiib alle ha inaga bad baadiyo sharaha nafaheena iyo sharta ibliisba.**

“Sida uu hadba

qalbigaagu yahay ayuun buu aduunkuna indhahaaga ula

muuqanayaa„

Saaxiib hadii aad nolosha ka heysato fikrad ah wey adag tahay, wey kugu adkaan, hadii se aad ka heysato fikrad ah wey fududahay, waa hubaal in ey kuu qosli oo ey kuu sahlanaan.

Saaxiib hadii aan tusaale yar ku siiyo bal u fiirso marka aan dugsiga dhiganeynay waxa eynu aaminsaneen in quraanku adag yahay, balse xaqiiqda ayaa eheed sida uu alle yiri:

**ولقديسرنا القرءان للذكر فهل من مدكر**

(Waan u fududeynay quraanka waansamid aawgeed, mid waansamaya ma jiraa)

Saaxiib waxaa igu soo dhacay in aan ku xasuusiyo buug la dhaho:

**(Salaad baa I dhaaftay**) oo mowduucyadiisa mid ka mid ah ka hadlayo qofka waxa uu aaminsan yahay inuu yahay, mowduucaasne waxa uu ugu magac daray qoraaygu:

(**Adigu waxa aad tahay fikradahaaga**)

Saaxiib ma waxa aad ku jirtaa dhalinta xadiiskan qalad fahmay:

الدنيا سجن المؤمن وجنة الكافر

**(Aduunku waa xabsiga mu, minka iyo janada gaalka)**

Saaxiib waa sax dunidan waa xabsiga muuminka, ee maahin nolosha mu,minka oo dhan inee xabsi ku tahay, oo kaliya adigu waxaa lagaa xabisay xumaha oo gaalka sameenayo sida: qamriga iyo sinada iwx.

“In aad shaqsiyadaada ixtiraamto waxaa ka mid ah, in aad ka dheeraato dadka aan qiimigaaga garaneyn„

Saaxiib marka aan ku leeyahay ka fogoow qof kaste oo aan qiimigaaga garaneyn, kama wado inaa dadka kugu dirayo, ee waxa aan rabaa in aad qiimo leedahay inaa tusiso, tusaale bal u fiirso qisada nabi ibraahim (csw) marka uu tolkii waaniye ee warkiisa diideen bal ey dabkii ku rideen ka dib waxaa u xigtay ibraahim in uu tolkii isaga tagay yirina:

**وقال إني ذاهب إلى ربي سيهدين**

(**Waxoo yiri anigu waxaan aad rabigey xagiisa_hijro_woona I toosin_wadada**)

Saaxiib adigane maxaa kuu diiday in aad ka hijrooto cid walba oo qiimigaaga hoos u dhigeysa sida ibraahiim camal mise waxa aad suganeysaa inta ey kobo kaa dhiganayaan.

“Niyooyinka wanaagsani ilaahey agtiisa kuma dayacmaan, si kaste oo ey dadku u qalad fahmaan„

Saaxiib bal u fiirso qisada qadar iyo nabi muuse waxa ey imaadeen magaalo cid ka mid ah ayee cuno weydiisten, cidiina wey u diideen in ey marti soo raan, ka dib waxa ey arkeen cidaan marti soorka u diiday in darbi darbiyadooda ka mid ah dumi rabo, markaas ayuu qadir u dhisay darbigii woona u taajiye, muusane waxa uu ku yiri: hadii aad doonto lacag waad ugu dhisi kartay? Qadar marka uu dhacdooyinka safar kooda uga waramaye ayuu ku yiri: ciyaalka aan darbiga u toosaaye miyaa, waxa ey ahaayeen agoomo, darbigane waxa aa ugu hoos duugnaay kanzi (keed) ilaheyna waxa uu doonay in ee la soo baxaan

keed kaas marka ey xoogoobaan, sababta aan lacag la aanta ugu dhisay miyaa:

وكان أبوهما صلحاً

**(Aabahood waxa uu ahaay mid wanaagsan)**

Saaxiib wanaaga aad maanta fasho ayuu alle ubadkaada iyo qoyskaada kuugu ilaalin bari, sida eynu qisada aabahaan wanaagsanaay ka dheehan karno.

Saaxiib alle marka uu ka soo sheekeye nabi luud, nabi nuux, nabi daawuud, nabi suleymaan, nabi ayuub, nabi ismaciil, nabi idriis, iyo dul kifli, ayuu alle yiri: dhamaantooda kuwa sabro ayee ka mid yihiin.

Sheekadaas ka dib alle waxa uu ka yiri:

**وأدخلنهم في رحمتنا إنهم من الصلحين**

**(Waxa eynu dhax galinay naxariistayada ayagu waxa ey ka mid ahaayeen kuwa suuban)**

**Saaxiib naxariista alle waxa aad ku heli niyadaada wanaagsan ee hadii aad dooneyso in aad ku suuban ku biirto kaliya raac aayadaan soo socota:**

**والذين ءامنوا وعملوا الصلحت لندخلنهم في الصلحين**

**(Kuwii rumeeye (xaqa) shaqeysay wanaag waxaan dhax galineynaa kuwa suuban (janada)**

Saaxiib caawi kan taagta daran, gacan qabo agoonta, wax bar kuwa aan waxba aqoon, wanaaga far kuwa xumaha haya, baari u noqo waalidka,

u dhibri kuwa qalbiga jaban, u dhoola cadeey kuwa ku xasdaya, u ducey kuwa dhibaatoonaya, dhamaan wanaagyadaan ayaa kaa dhigaya mid ka mid ah kuwa wanaagsan.

Saaxiib alle ka bari inuu ku heleelsiiyo ku wanaagsan sida uu nabi yuusufba ku duceystay:

**توفني مسلماً وألحقني بالصلحين**

**(Allow I oofso_ dhinsii_ aniga oo muslim ah, ihaleelsii kuwa wanaagsan)**

**Saaxiib wanaaga aad fasho ayaa ubadkaada dunida wax ugu taraya, aaqiradaadane ku anfacaya.**